

ORIENTATION TO ONTARIO

Ma ogtahay inaad ka qayb gali karto
aqoon iswaydaarsi BARASHADA
ONTARIO?

Si aad toos noogula soo xidhiidho,
fadlan wac khadkayada laba luqolaha
ah 1-855-626-0002 ama noogu soo dir
email O2O@costi.org.

Funded by / Financé par



Immigration, Refugees and Citizenship Canada / Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada

Ontario

Orientation to Ontario



HORDHAR KU SOCDA DADKA CUSUB EE SOO DEGAAYA ONTARIO

Somali



orientation to
ontario  l'ontario
c'est chez moi

HORDHAR KU SOCDA DADKA CUSUB EE SOO DEGAAYA ONTARIO



March 2023

Mashruuca Barashada Ontario/L’Ontario, c’est chez moi waxaa maalgelinaaya Haayada Soo Galootiga, Qaxootiyaasha iyo Muwaadinimada ee Canada (IRCC) iyo Dawladda Ontario.

Mashruucaan labada luuqadood ku baxaaya ayaa loo abuuray in lagula shaqeeya dadka cusub ayadoo loo maraayo buuga shaqada, xaashida xaqqiida, chatbot, ArriveON App, aqoon kororsiyada iyo Webseedka Barashada Ontariyo oo ku qoran Ingiriis <https://orientationontario.ca/en> iyo af Faransiis orientationontario.ca/fr iyo afaf kale orientationontario.ca/en/other-languages



Sawir koodka QR si aad u gasho buuga shaqada O2O



Sawir koodka QR si aad u gasho warqadaha xaqqiida O2O



Sawir koodka QR si aad u gasho ilaha O2O ee luuqadaha kale



GET IT ON
Google Play



Download on the
App Store



Get it from
Microsoft

XOG KU SAABSAN BUUGAAN SHAQADA

Kusoo dhawoow Ontario, Canada. Canada waa bulsho sharaf badan, oo dhaqanno badan leh, soona dhawaysa dadka cusub ee ka imaanaaya daafaha caalamka.

Shacabka Ontario oo ka badan 16 milyan¹ waxaa kamid ah dad ka yimid in ka badan 250 wadan kuwaasoo ku hadla wax ka badan 200 oo luuqadood.² Degista wadan cusub waa khibrad farxad badan. Buugga Tababarka ee Ontario ayaa ku hagi doona.

WAXYAABAHA AAD KA HELAYSO BUUGGA TUSMADA

Buuggaan tusmadu wuxuu ku siinayaa xogta aasaasiga ah ee aad ugu baahan degista Ontario. Wuxuu ka kooban yahay lix qaybood. Qayb kasta waxay leedahay mawduucyo kaladuwan oo ku siinaaya xog la xariirta gobalka oo dhan, ayna kujiraan webseedyada iyo lambarada taleefannada xafiisyada dawlada.

Inta badan qaybaha ayaad ka helaysaa qorsheyaasha dagista oo soo koobaaya shaqooyinkaaga guud. Waxaad sidoo kale ka helaysaa su'aalaha qaar oo ku jira qaybta ciwaankeedu yahay. "Waxyaabaha aad ka Fakarayso." Su'aalahaan waxay kaa caawinayaan inaad ka fakarto dookhyada aad u baahan tahay inaad gaarto inta lagu jiro hanaankaaga dagista.

Si aad u furato qorshahaaga dagista ee gaarka ah, waxaad u baahan tahay inaad hesho xog dheeraad ah. Buugga tusmada ayaa ku siinaaya fikradaha qaar oo la xariira meesha aad ka helayso xogta oonleena ah wuxuuna ku siinayaan farsamooyin muhiim ah.

Waxaad sidoo kale buuggaan tusmada ka helaysaa barta oonleena ah!
HK&>G|9|MBHG|HG|9|K&H|<9t>G|asagoo Af-Ingiriis ah!
HK&>G|9|MBHG|HG|9|K&H|<9t>?|ku qoran Faransiis. Sidoo kale waxaa lagu heli karaa dhawr luuqadood oo kale, kuwaasoo lagu heli karo oonlaynka iyo waraaqo daabacan ba.

U qaado Buugga Tusmada ee Barashada Ontario qariiradaada iyo hagahaaga: waxaad u adeegsan kartaa inaad go'aansato meesha aad u baahan tahay inaad aado iyo sida aad ku tagayso meeshaas.

FARSAMADA QORSHAYNTA DAGISTA

Si aad u samayso qorshehaaga gaarka ah ee degista, waxaad ka helaysaa farsamada qorshaynta dagista oo mawduuc-mawduuc ah dhammaadka qayb kasta.

- Farsamadaan waxay kuu sahlayaa inaad hesho ilaha xogta muhiimka ah waxayna kuu samaynaysaa jadwallo aad ku gaarayo yoolalkaaga mudada gaaban.

- Farsamadaan waxaa sidoo kale laga heli karaa barta HK&>G|9|MBHG|HG|9|K&H|<9t>G

FARSAMADA KU NOOLAANSHAHA CANADA

Laanta Soo Galootiga, Qaxootiyaasha iyo Muwaadinimada ee Canada (Immigration, Refugees and Citizenship Canada) ayaa abuurtay farsamo oonleena ah oo aad sidoo kale u adeegsan karto abuurista qorshahaaga dagista. Ka fiiri farsamada barta <9G9=9|<9 ama ?G=EGD|9|t'P>|<H F><9G|

KUSOO DHAWOOW TUSMADA CANADA: WAXA AY TAHAY INAAD OGAATO

Dhammaan buuggaan tusmada, waxaad ka helaysaa tixraacyada xogta aad ka heli karto tusmada Kusoo Dhawoow Canada Raadi calaamadaan:

Welcome to Canada

Waxaad sidoo kale ka akhrinta kartaa barta oonleena ah <9G9=9|<9|ama|
?G=EGD|9|t'P>|<H F><9G|

FINDLINKS (LIFAAQA-XOGTA)

Si aan kaaga caawino helitaanka xogta si fudud, waxaan kusoo darnay mawduucyada muhiimka ah ee dhammaan bogaga internetka LIFAAQA-XOGTA oo ku gaynaaya bogga gaarka ah ee oonlaynka.

6|9|9|LAH| * ?G|L|K|R|H|?|#G9G<>|H|G|9|K&H|<9|9 F 9|?G=EGD|9|t'P>|



GALINTA INTERNETKA

Kumbuyuutar/internet bilaash ah ayaa laga heli karaa maktabadaha iyo wakaaladaha dejinta ee Ontario oo dhan. Wi-Fi bilaasha ah waxaa laga heli karaa aaladaha mobilada ee meelaha caamka ah ee kala duwan.

MAWDUUCYADA KU JIRA

Barashada Canada iyo Ontario

Barashada Dawlada	4
Canada	5
Barashada Ontario	6
Wakaaladaha Dib u dejinta	10
Lambarada Taleefanka iyo Webseedyada Muhiimka ah	11

La noolaanshaha Bulshadaada Cusub

Daryeelka Caafimaadka	14
Adeegyada Macaamiisha	17
Guriyaynta	18
Ka qaybgaleyaasha Xariirka	21
Gaadiidka	22
Xaquuqaha iyo Adeegyada Sharciga	24
Qorshaha Dejinta	26

Waxbarashada iyo Tababarka

Daryeelka Carruurta	30
Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare	31
Waxbarashada Jaamacadaha	33
Sii wadista Waxbarashada	34
Tababarka Luuqada	35
Qorshaha Dejinta	36

Shaqada iyo Ganacsiga

U Diyaar Garoowga Shaqada	40
Raadinta Shaqada	42
Xaquuqaha Goobta Shaqada	44
Bilaabida Ganacsigaaga	46
Qorshaha Dejinta	47

Lacagta iyo Dhaqaalaha Gaarka ah

Lacagta iyo Bangiyada	50
Qaadashada Deynta	51
Canshuuraha	52
Gunnooyinka iyo Caawimaada Bulshada	53
Qorshaha Dejinta	54

Dadka iyo Deegaanka

Isdhexgalka	56
Dadka Naafada ah	57
Xariirada Qoyska	58
Daryeelida Bulshada	59
Qorshaha Dejinta	60

Liiska

Ilaha Dawlada Federaalka ah	62
Ilaha Dawlada Ontario	63
Tusmada	64



(N|@>E||W9E>>?HHG



\$9::W99GD9|DA9=D9|WHHLD9|9A



6NLNLL:G|*NA::F|9A

BARASHADA CANADA IYO ONTARIO

Qaybtaan waxay xog kaa siinaysaa Canada iyo Gobalka Ontario, ayna ku jiraan deegaanka wadanka, cimiladiisa, dadkiisa, dhaqaalihiiisa, luuqadaha iyo dawlada. Waxaad sidoo kale helaysaa xog ku saabsan wakaaladaha dib u dejinta oo ay la socdaan lambarada taleefanka iyo webseedyada muhiimka ah.

4

Barashada
Canada

5

Dawlada

6

Barashada
Ontario

10

Wakaaladaha
Dib u dejinta

11

Lambarada Taleefanka
iyo Webseedyada
Muhiimka ah





BARASHADA CANADA

Canada waa wadanka labaad ee ugu balaaran aduunka, ayadoo leh dhun baaxadiisu dhan tahay 10 milyan oo kiloomitir iskuweer (3.9 milyan mayl iskuweer). Sabab la xariirta balaca dhulkiisa, Canada ayaa leh dhul kaladuwan, ayna ku jiraan buuro, kaymo, dhul cawseed iyo dhul barafeed saxaro ah.

MAGAALOYINKA, GOBALLADA IYO DEGMOOYINKA

Casimada Canada waa Ottawa, waxayna ku taalaa gobalka Ontario. Waa magaallada afaraad ee ugu wayn Canada. Saddexda magaalo ee ugu waawayn Canada waa Toronto (Ontario), Montreal (Quebec) iyo Vancouver (British Columbia).

Canada waxay leedahay 10 gobal iyo saddex deegaan hoosaad, kuwaasoo mid kasta leeyahay caasimad u gaar ah. Goballada waawayn ee Canada waa:

- Goballada Atlantic (Newfoundland and Labrador, Prince Edward Island, Nova Scotia iyo New Brunswick).
- Bartamaha Canada (Quebec iyo Ontario).
- Goballada Prairie (Manitoba, Saskatchewan iyo Alberta).
- Xeebta Galbeedka (British Columbia).
- Waqooyiga (Nunavut, Northwest Territories iyo Yukon).

 Welcome to Canada

DADKA ASALKA AH IYO SOO GALOOTIGA

Canada waxaa asalkeeda daganaa sadex qoomiyadood: Asaliyiinta, Faranjiga iyo Biritishka.

Dadka asaliyiinta ah ayaa ku noolaa Canada kahor intaysan imaan musaafiriinta reer Yurub, dadka diinta faafiya iyo dadka deegaan doonka ah.

Hadda, magaca ayaa loo adeegsadaa saddex kooxood: Quruumihii koobaad (mararka qaar loo yaqaano “Indians”), Inuit iyo Métis. Dadka asaliyiinta ah ayaa ku nool Canada deegaano u gaar ah iyo sidoo kale magaalooyinka wadanka.

Dadka ka yimid Faransiiska ayaa yimid sanadihii 1600aad iyo 1700aadkii, halka dadka ku hadla Ingiriisiga ay ka yimaadeen England, Wales, Scotland iyo Ireland intii u dhexaysay qarniyadii 17aad iyo 20aad.

Intii lagu jiray 200 ee sano ee lasoo dhaafay, dadka ka kala yimid kooxaha qoomiyadaha iyo diimaha kaladuwan ayaa usoo haajiray Canada. Maanta, ku dhawaad 20 boqolkiiba dadka Canada ayaa ku dhashay meel ka baxsan Canada. Magaallada Toronto, tiradaan ayaa ka badan 45 boqolkiiba.

Ingiriisiga iyo Faransiiska ayaa ah labada luuqadood ee rasmiga ah ee Canada. Sharciyan, dawlada Federaalka ah waa inay ku bixisaa adeegyada dhammaan dalka Canada labada af Ingiriis iyo Faransiis.

 Welcome to Canada

QAADASHADA DHALASHADA CANADA

Waxaad bilaabi kartaa u diyaar garoowga qaadashada sharciga Canada isla marka aad timaado Canada. Ka fiiri Xog dheeraad ah qaybta Kusoo Dhawoow Canada.



Ka akhri tusmada bilaashka ah ee barashada imtaxaanka muwaadinimada [barta](#)

 Welcome to Canada

DAWLADA

Canada ayaa ah labada boqortooyo dastuur ku shaqaysa iyo dawlad federaal ah oo dimuqraadi ah. Tani waxay ka dhigan tahay in hogaamiyaha qaranka ee Canada uu yahay Boqorada ama Boqorka, halka Raysal wasaaruhu yahay madaxa xukuumada. Waajibaadka muhiimka ah ayaa loo qaybshaa dawlada federaalka ah iyo dawlada gobalka ama deegaanka. Dadka reer Canada ayaa doorta wakiiladooda federaalka, gobalka iyo dawlada hoose ayagoo adeegsanaaya nidaamka codaynta dadwaynaha.

Boqorada ama Boqorka waxaa ku matala Canada Maamulka Guud (federaalka) iyo Gudoomiyaal (goballada).

 Welcome to Canada

DAWLADA FEDERAALKA

Dawlada federaalka ayaa maamusha arrimaha qaranka sida difaaca, arimaha dibada, lacagta, bangiga, caymiska shaqada, adeegyada boostada iyo sharciga danbiyada. Dawlada federaalka ah waxaa hogaamiya Raysal Wasaaraha.

Wakiilada dawlada federaalka ah waxaa loogu yeeraa **Xubnaha Baarlamaanka** (ama **MP-yada**).

DAWLADA GOBALKA/ DEEGAANKA

Dawladaha gobalka/deegaannada ayaa maamula arimaha sida caafimaadka, waxbarashada iyo gaadiidka. Gobalka Ontario, laanta maamusha gobalka waxaa loogu yeeraa **Baarlamaanka Ontario**. Wakiilada dawlada gobalka ah waxaa loogu yeeraa Xubnaha **Baarlamaanka Gobalka** (ama **MPP-yada**).

Dawlada hoose ee magaallada (dawlada deegaankaaga ama magaallada) ayaa maamusha adeegyada maxaliga ah sida aruurinta qashinka iyo adeegyada dalxiiska. Wakiilada dawlada hoose waxaa la yiraahdaa golaha deegaanka.



- Ka fiiri xog dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka dawlada Canada barta 9G9=9j@<9?G=EGDj9Mt<@HOLRLM> F ama 9G9=9j@<9?G=EGDj9Mt<@HOLRLM> F
- Ka fiiri xog dheeraad ah oo ku saabsan dawlada gobalka ee Ontario barta HGI9KHj<9?G=EGDj9Mt<@HOHG19KH ama HGI9KHj<9?G=EGDj9Mt<@HOHG19KH
- Ka ogoow xog dheeraad ah oo ku saabsan dawlada hoose ee ka shaqeeya Ontario barta RHnKEH<9E@HO>KG F>GMj<HF

WAXYAABAH AAD KA FAKARAYSO

Qofkee ah wakiilkayga Baarlamaanka federaalka (MP) waase maxay arimaha uu wax ka qabto?

Qofkee igu matala dawlada Gobalka (MPP) waase maxay arimaha uu wax ka qabto?

Sidee ayaan ula xariirayaa wakiilka golaha deegaanka igu matala?





BARASHADA ONTARIO

Ku dhawaad nus kamid ah dhammaan dadka soo galootiga ah ee yimaada Canada ayaa doorta in Ontario noqoto hooygooda cusub.³ Ontario waxaa sharaf u ah bulshadeeda dhaqannada badan leh waana hooyga ganacsiyada caalamiga ah ee kaladuwan iyo ganacsiga.

DADKA IYO DEEGAANKA

Ontario waa gobalka ugu dadka badan (in ka badan 14 milyan oo qof). Inta badan dadka reer Ontario ayaa ku nool magaalooyinka waawayn oo ku yaala deegaanada u dhow xuduuda koonfureed ee gobalka, ee ku xiga Great Lakes. Si guud, magaalooyinka iyo xaafadaha dhinacyada waqooyiga gobalka ayaa ah kuwo yaryar.

Magacyada magaalooyin badan oo ku yaala Ontario ayaa muujinaaya taariikhda iyo hidaha dadka asaliyiinta ah ee gobalka ku badan: Ontario waa eray Iroquoian ah “kanadario,” kaasoo macnihiisu yahay “harada quruxda badan” ama “biyaha wirqaaya.”

Ontario waa gobalka afaraad ee ugu dhulka wayn 10 gobalka iyo sadexda deegaan maamul ee ay Canada ka kooban tahay. Si aan kuu siino fikir la xariira balaca gobalka, Ontario ayaa labo jibaar ka wayn wadanka Faransiiska waxayna le’eg tahay sadex meelood oo meel dhul waynaha India.



Xog badan ka ogoow qorshaynta safar aad ku tagto Ontario adoo booqanaaya barta rasmiga ah ee dalxiiska Dawlada Ontario:

destinationontario.com

Ku raaxayso dhulka dabiiciga ah ee Ontario adoo booqanaaya beerta raaxada ee Gobalka Ontario. Xog badan ka ogoow

barta: ontarioparks.ca

³ Xigasho: Citizenship and Immigration Canada: canada.ca ama findlink.at/prstats



DHAQANKA DADKA ASALIYIINTA AH

“Dadka asaliyiinta ah” waa magac si guud loogu adeegsado dadka asalkii hore dagananaa Waqooyiga Maraykanka iyo dadkii ay sii dhaleen. Waxay daganaayeen Ontario ugu yaraan 7,000 sano.

Dastuurka Canada ayaa aqoonsan saddex kooxood inay yihiin dadka asalka u lahaa wadanka: Quruumihii koobaad, Métis iyo Inuit. Kuwaani waa saddex qoomiyadood oo leh taariikho, luuqado, dhaqanno iyo diimo gaar u ah. Quruumihii Koobaad ee ku nool Ontario waxaa kamid ah Algonquian- oo ku hadla Cree, Oji-Cree, Algonquin, Ojibwa, Odawa, Potawatomi iyo Delaware, iyo lixda qabiil ee ku hadla afka Iroquoian ka (Mohawk, Oneida, Onondaga, Cayuga, Seneca iyo Tuscarora). Métis waa dad ka kooban isku dhafka Quruumaha Koobaad iyo dadka Reer Yurubka ahaa kuwaasoo magac ahaan isku yaqaana Métis. Inuit waa dadka asaliyan u dhashay Arctic Canada, waxaana kamid ah Nunavut, the Northwest Territories, Yukon, northern Quebec iyo Labrador.

Juun 21 ayaa ah Maalinta Qaran ee Dadka Asaliyiinta ah. Sanad kasta dadka reer Ontario ayaa ka qaybgala munaasabadaha dhaqanka ee dadka asaliyiinta ah waxayna wax ka bartaan dhaqanka dadka Asaliyiinta ah ee ku dhaqan Ontario iyo wadanka oo dhan.

Sida ku cad tirakoobkii Canada ee 2021, in ka badan 1.8 milyan oo qof ayaa isku aqoonsan inay yihiin dadka Asaliyiinta ah. Gudaha Canada, Dadka Asaliyiinta ah ayaa ka kooban 5.0 boqolkiiba dadwaynaha guud ee Canada.

Ontario ayaa leh dadka ugu badan ee dadka asaliga ah. Hadda waxaa Ontaariyo ku nool in ka badan 406,585 First Nations, Métis iyo Inuit oo ka dhigan 2.9 boqolkiiba tirada guud ee dadwaynaha Ontaariyo iyo 22.5% dhammaan dadka asaliga ah ee Canada.

Waxay ku nool yihiin dhulkooda, magaalooyinka iyo deegaannada miyiga ah. Qaarkood ayaa ku nool deegaanno yaryar oo baadiye ah oo keliya lagu tagi karo diyaarad ama wadooyinka barafka ee xiliga qaboobaha. Inta badan bulshooyinka asaliyiinta ah ee magaalooyinka waawayn ayaa ku nool Thunder Bay, Sudbury, Sault Ste. Marie, Ottawa iyo Toronto.

Si aad u hesho dheeraad ah oo ku saabsan dadka asaliyiinta ah, booqo aadnc-aandc.gc.ca iyo ontario.ca/ministry-aboriginal-affairs

RUN IYO DIB U HESHIISIN

Sebtembar 30 waa Maalinta Qaranka ee Runta

iyu Dib-u-heshiisiinta iyo Maalinta Shaadhka Orange, oo u heellan in la xasuusto carruurta aan waligood ka soo noqon dugsiyada la deggan yahay iyo sharfidda Badbaadayaasha, qoysaskooda, iyo bulshooyinka. Xuska taariikhdan naxdinta leh ayaa ah

muhiimka u ah geeddi-socodka dib-u-heshiisiinta, oo loo asaasay fasax sharci oo federaal ah. Maalinta Shaadhka Orange, oo ay hogaaminayaan bulshooyinka asaliga ah, waxay ujeedadoodu tahay in kor loo qaado wacyiga ku saabsan saamaynta jiilka ka dhexeeya dugsiyada la deggan yahay iyo kor u qaadida fikradda ah “Ilmo kastaa waa muhiim.” Shaadhka liimiga ah

waxay astaan u tahay khasaaraha dhaqanka, xoriyada, iyo isku kalsoonida ee ay la kulmaan carruurta asaliga ah.

Si aad wax badan uga barato, booqo: canada.ca

LUUQADAH

Ingiriisiga ayaa ah luuqada uga badan ee looga hadlo gobalka waana luuqada koowaad ee ganacsiga. Faranjiga ayay ku hadlaan bulshada Francophone ee reer Ontario waxaana la baraa dhammaan carruurta dugsiyada Ontario. Haddii aad si fiican u taqaano labadaba af Faransiiska iyo Ingiriisiga, waxaad leedahay fursad dheeri ah marka aad shaqo raadsato.

DHAQAALAH

Ontario waxay leedahay bulsho kaladuwan. Qaybta koonfureed ee gobalka waxaad ka helaysaa adeegyada dhaqaalaha, ganacsiyada hoteellada, wax soo saarka, cilmiga nololaha iyo tignooloojiyada macluumaadka iyo isgaarsiinta.


Dhanka waqooyi ee gobalka, dhaqaalaha ayaa taariikhiyan ku salaysan khayraadka dabiiciga ah. Warshadaha waawayn waxaa ku jira macdan qodista, kaymaha iyo korontada.

Ka ogoow xog badan oo ku saabsan dhaqaalaha Ontario Wasaarada Maaliyada: ontario.ca iyo findlink.at/economy

 Welcome to Canada

CIMILADA

Heerkullada Bishii ee Caadiga ah ee Ontario (lagu cabiraayo degrees Celsius)⁴



⁴ Xigasho: currentresults.com ama findlink.at/091

MA OTAHAY?

- In Dabaaldegga Filimaanka Caalamiga ah ee Toronto (TIFF) la qabto Sibteembar kasta ayna tahay mid kamid bandhigyada filimaanta ee ugu caansan uguna balaaran caalamka.
- Ontario ayaa taageerta 20 jaamacadaha dawlada ah iyo 24 kuleej oo lagu barto farshaxanka iyo tignooloojiyada.
- Gudaha Ontario, waxaa ku yaalla in ka badan 1,000 baaleyaasha korontada dabaysha ku shaqeeya - arintaan ayaa ka dhigaysa Canada wadanka hogaanka u haya tamarta dabaysha laga dhaliyo.
- Beerta Raaxada Gobalka ee Algonquin ayaa la abuuray 1883 waana beerta raaxada ee ugu horeysay uguna wayn Ontario.

XAQIIQOYINKA KOOBAN EE KU SAABSAN ONTARIO

Caasimada

Toronto, oo ah magaallada ugu balaaran Canada, ayna ku nool yihiin ku dhawaad 5.9 milyan oo qof.

Ubaxa Rasmiga ah


Trillium Cad

Geedka Rasmiga ah

Eastern White Pine

Shinbirta Rasmiga ah

Lon ka Guud





WAKAALADAHA DEJINTA DADKA

Marka aad timaado Ontario, waxaad caawimaad ka helaysaa wakaalada dib u dejinta ee maxaliga ah. Wakaaladaha dib u dejinta waa ururo bulsho oo caawiya dadka wadanka ku cusub. Adeegyadu waa kuwo sirta xifdinaaya, bilaash ah laguna heli karo luuqado badan.

Shaqaalaha dib u dejinta ayaa ku caawin kara asagoo ku siinaaya xogta iyo tababarka la xariira adeegyada bulshada iyo dawlada ee kaladuwan oo badan. Waxaad wax ka waydiin kartaa guriyeynta, daryeelka caafimaadka, tababarka luuqada, sida lagu helo shaqo iyo adeegyada badan ee kale ee la heli karo.

Wakaaladaha dib u dejinta oo badan ayaa bixiya barnaamijyo kaa caawinaaya adiga iyo qoyskaaga inaad la qabsataan bulshadiina cusub.

Dawlada Canada iyo Ontario ayaa baxsha maal gelinta ururadaan si ay u bixiyaan adeegyada dib u dajinta ee dadka ku cusub dhammaan Ontario.

HELISTA ADEEGYADA KA SHAQEEYA AAGAAGA



Settlement.org ayaaad ka helaysaa lifaaqyada adeegyada bulshada ee deegaankaaga iyo sidoo kale xog muhiim ah oo ku saabsan baahiyahaaga dagista: settlement.org

(Immigration, Refugees and Citizenship Canada) Laanta Soo galootiga, Qaxootiyaasha iyo Muwaadinimada ee Canada ayaa ku siinaysa liiska wakaaladaha dib u dejinta oo aad ka helayso canada.ca ama findlink.at/cic-serve

(Ontario Ministry of Children, Community and Social Services) Wasaarada Carruurta, Bulshada iyo Adeegyada Dadka ee Ontario ayaa haysa liiska wakaaladaha bixiya adeegyada dib u dejinta oo laga helaayo ontario.ca/page/citizenship-and-immigration



Waxaad wici kartaa 211 si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada maxaliga ah.



LAMBARADA TALEEFANKA EE MUHIIMKA AH

9-1-1 – Xaalada degdega ah

Taleefankaaga ka wac **911** marka xaalad degdeg ah jirto xili kasta marka aad u baahan tahay booliiska, dab damiska ama gaadiidka gurmadka degdega ah. Shaqaalaha laynka kaa qabta ayaa ku waydiin doona ciwaanka buuxa ee gurigaaga, uuna ku jiro lambarkaaga boostada. Turjumaanno ayaa lagu heli karaa in ka badan 150 luuqadood.

911 waa adeeg loogu talagalay xaaladaha degdega ah keliya

2-1-1 – Adeegyada

Taleefankaaga ka wac **211** si aad u hesho xog iyo isku xir ku aadan adeegyada bulshada iyo dadka ee deegaankaaga. Adeegaan ayaan la heli karaa 24 saac maalintii, 365 maalmood sanadkii kuna baxa in ka badan 150 luuqadood. Wicitaanka **211** waa lacag la'aan gebi ahaanna xogtaadu waa qarsoodi. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan adeegaan, booq 211ontario.ca

ServiceOntario INFOLine


Wac **1-800-267-8097** si aad u hesho xog ku saabsan adeeg kasta oo dawladeed aadna u ogaato meesha aad ka helayso xarunta ServiceOntario ee deegaankaaga. Waxaad u baahan tahay inaad booqato xarunta ServiceOntario si aad u codsato kaarkaaga Qorshaha Caymiska Caafimaadka ee Ontario (OHIP), aad u hesho ruqsad darawal aadna u hesho ruqsada taargada gaarigaaga.

Service Canada INFOLine

Wac **1-800-622-6232** si aad u hesho xog ku saabsan soo galootiga, canshuurta, muwaadinimada, caymiska shaqada, lambarkaaga caymiska bulshada ama barnaamij ama adeeg kasta oo kale oo federaal ah.

Caawimaada Liiska

Wac **411** si aad u hesho lambarka taleefanka ee guri ama ganacsi. Qarashka adeegaan waa \$3.50 calaa lambar. Qarashka ayaa lagusoo dari doonaa biilka taleefankaaga.



WEBSEEDYADA MUHIIMKA AH

ontario.ca

Wasaraada Carruurta, Bulshada iyo Adeegyada Bulshada ee Ontario (Ontario Ministry of Children, Community and Social Services) - webseedka rasmiga ah. Ka hel xog ku saabsan dejinta dadka cusub, tababarka luuqada iyo barnaamijyada tababarka aqoon kororsiga ah. Barnaamijyada tababarka aqoon kororsiga ah ayaa kuu diyaarinaaya inaad uga shaqayso xirfadaada ama aqoontaada gudaha Ontario.

canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship.html

Waaxda Soo galootiga, Qaxootiyaasha iyo Muwaadinimada ee Canada (Immigration, Refugees and Citizenship Canada) - webseedka rasmiga ah. Ka hel lifaaqyo iyo muuqaallo ku aadan mawduucyada kaladuwan ee dib u dejinta iyo sidoo kale farsamada "ku noolaanshaha Canada", kaasoo kaa caawinaya inaad abuurto qorshehaaga gaarka ah ee degista wadanka. Booq findlink.at/livingcana

settlement.org

Helo xog kala duwan oo la xariirta dagista, ayna ku jirto meesha aad ka helayso adeegyada dib u dejinta ee maxaliga ah.

servicecanada.gc.ca

Wuxuu kuu sahlayaa inaad hesho barnaamihyada iyo adeegyada faraha badan ee Dawlada Canada. Waxaad ka helayso xog gaar u ah dadka cusub barta findlink.at/ncservices

serviceontario.ca

Xog badan ka ogoow barnaamijyada iyo adeegyada Ontario, ayna ku jiraan kuwa la xariira shaqada, waxbarashada, tababarka iyo darawalnimada.

yellowpages.ca

Hel lambarada guryaha la dagan yahay, ganacsiga iyo dawlada. Waxaad sidoo kale helayso nuqulka daabacan ee diiwaanka taleefannada (oo loo yaqaano buuga taleefannada), kaasoo aad bilaash uga helayso dhammaan guryaha xaafadaha ah ee Ontario. Haddii aad u baahan tahay buuga taleefanka, wac **1-800-268-5637**.

canada.ca

Wuxuu bixiyaa xog iyo adeegyo si looga caawiyo shaqaalaha aduunyada kale wax ku soo bartay inay helaan aqoonsiga ku haboon ee shahaadooyinkooda.





O CANADA

O Canada!
Our home and native land!
True patriot love
in all of us command.

With glowing hearts
we see thee rise,
The True North
strong and free!

From far and wide
O Canada,
we stand on guard for thee.

God keep our land
glorious and free!

O Canada,
we stand on guard for thee.

O Canada,
we stand on guard for thee.



LA NOOLAANSHAHA BULSHADAADA CUSUB

Qaybtaan ayaa ku siinaysa xog ku saabsan noloshu maalinlaha ah ee Ontario, ayna ku jiraan sida aad ku helayso daryeelka caafimaadka, helitaanka guri iyo barnaamijyada dalxiiska ee bulshada, inaad hesho dukaannada adeegga iyo sida aad u adeegsanayso qaybaha kaladuwan ee gaadiidka deegaankaaga. Waxaad sidoo kale baran kartaa xaquuqdaada aasaasiga ah iyo sida aad ku helayso adeegyada sharciga. Inta aad raadinayso aadna adeegsanayso adeegyadaan, bulshadaada cusub ayaa mardhow noqon doonta hooygaaga cusub.

14

Daryeelka
Caafimaadka

17

Adeegyada
Macaamiisha

18

Guriyaynta

21

Ka qaybgalka
Bulshada

22

Gaadiidka

24

Xaquuqaha iyo
Adeegyada Sharciga

26

Gorshaha Dejinta





DARYEELKA CAAFIMAADKA

Dawladaha federaalka, gobalka iyo deegaannada ayaa door muhiim ah ka ciyaara maamulka nidaamka caafimaadka daryeelka. Bixinta adeegyada daryeelka caafimaadka waa masuuliyad saaran dawladaha gobalka iyo deegaanka. Barnaamijka caymiska caafimaadka qaran ee Canada (oo loo yaqaano Medicare) ayaa siiya dhammaan dadka deegaanka adeegyada qarashkooda dawladu dhiibtay ee isbitaallada iyo dhakhaatiirta.

CAYMISKA CAAFIMAADKA

Dawlada Ontario ayaa bixisa daryeelka caafimaadka guud dadka gobalka ku nool ayadoo usii marisa Qorshaha Caymiska Caafimaadka ee Ontario (OHIP). Qorshahaan ayaa dhiibaaya qarashka adeegyada aasaasiga ah ee caafimaadka sida booqashooyinka dhakhtarka qoyska iyo daryeelka caafimaadka ee degdega ah. Marka aad tahay muwaadin Canada u dhashay ama qof daganaansho rasmi ah haysa, waxaa qarashka barnaamijkaan lagaaga jaraa canshuurta dakhliga.

Si aad qayb uga noqoto OHIP, waa inaad hesho OHIP (oo badanaa loogu yeero kaarkaaga caafimaadka) waana inaad la timaadaa markasta oo aad adeegyada daryeelka caafimaadka isticmaalayso. Kaarka ayaa ah cadaynta muujinaysa inaad u qalanto adeegyada daryeelka Caafimaadka ee Ontario.

OHIP+

Wax ka badan 5,000 oo daawooyin ayuu daboolaa barnaamijka OHIP+ oo si bilaash ah lagu siiyo dadka da'doodu tahay 24 sano ama ka yar ee aan lahayn caymis caafimaad oo gaar ah. Uma baahnid inaad iska diiwaan geliso ama iska qorto si aad u hesho caymiska OHIP — waxa keliya ee aad u baahan tahay waa lambarka kaarka caafimaadka iyo daawo u qalanto.

Caymiska OHIP+ ayaa kaa dhammaanaaya marka aad gaarto dhalashadaada 25aad, ama haddii aad hesho caymis gaar loo leeyahay.



Si aad xog badan uga Ogaato OHIP+ booqo ontario.ca/page/ministry-health

Hel qeexitaanka adeegyada kaladuwan ee OHIP ay qarashkooda dhiibto webseedka Wasaarada Caafimaadka ee Ontario ontario.ca/page/ministry-health ama findlink.at/healthont



OHIP ayaan bixin doonin qarashka dhammaan baahiyaha daryeelka caafimaadka. Tusaale ahaan, ma bixiso qarashka adeegyada daryeelka ilkaha ama daawooyinka laguu qoro.

Loo shaqeeyaasha qaarkood ayaa ku siinaaya qorsheyaasha gunnada caafimaadka oo daboolaa qaar kamid ah qarashaadkaan dheeraadka ah. Caymiskaan ayaa kaladuwan loo shaqeeye kasta. Waxaad sidoo kale iibsana kartaa caymis gaar loo leeyahay oo daboolaa qarashaadka daryeelka caafimaadka ee aysan daboolayn OHIP.

Haddii aadan haysan caymiska OHIP, waxaad u awoodi kartaa inaad hesho xarunta caafimaadka bulshada oo aad ka helayso adeegyada kooban. Ka fiiri ilaha xogta bogga xiga.

Xog badan ka ogoow daryeelka caafimaadka ee Ontario oo aad ka helayso webseedyada soo socda:



- health.gov.on.ca ama findlink.at/ohip-info
- [settlement.org](https://settlement.org/ontario/health) ama settlement.org/ontario/health

QAADASHADA KAARKA QORSHAHA CAYMISKA CAAFIMAADKA EE ONTARIO

Waa inaad codsataa kaarka OHIP sida ugu dhakhsaha badan marka aad hesho dukumiintiyada muhiimka ah. Hase yeeshee, waa inaad sugtaa saddex bilood kadib marka aad timaado Canada si aad u hesho. Mudadaan sugitaanka ayaa bilaabanaysa taariikhda ku qoran Diiwaankaaga Soo degista Wadanka.

Si aad u codsato kaarka OHIP, booqo xarunta kuugu dhow ee ServiceOntario. Keen dukumiintigaaga muwaadinimada ama soo galootiga ee u qalmida OHIP oo aad soo raacinayso dukumiintiyada kale ee aqoonsiga. Dukumiintiyadaan ayaa ku jira settlement.org ama findlink.at/hc-docs



Si aad u hesho xarunta ServiceOntario oo kuu dhow: Kwac xarunta ServiceOntario INFOline lambarka

1-800-267-8097 ama

Booqo webseedka ServiceOntario oo ah serviceontario.ca ama findlink.at/mto-office

Inta lagu jiro mudada sugitaanka waxaad u qalmi kartaa helitaanka xarunta caafimaadka bulshada si aad u hesho adeegyada dhiman. Taas badelkeeda, waxaad iibsana kartaa caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay. Arag ilaha xogta ee ku qoran geeska bogga.

SHARDI DHAAFKA MUDADA SUGITAANKA

Ma jirto wax sugitaan ah oo loogu talagalay caymiska OHIP. Haddii aad u qalanto, waxaad heli doontaa caymis caafimaad oo degdeg ah. Soo ogow haddii aad u qalanto.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan muddada sugitaanka ee OHIP, booqo ontario.ca ama findlink.at/waitingperiod

DARYEELKA CAAFIMAADKA FEDERAALKA EE QAXOOTIYAASHA

Barnaamijka ku meelgaarka ah ee Caafimaadka ee Federaalka ayaa siiya dheefaha caymiska daryeelka caafimaadka oo ku meelgaar ah qaxootiyaasha u qalma, ayna ku jiraan kuwa aan u qalmin OHIP. Barnaamijka waxaa ku jira caymiska daawada lagu qoro.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan u qalmida caymisyada noocaan ah, fadlan booqo canada.ca ama findlink.at/ifhp

DHAKHTARKA QOYSKAAGA

Dhakhtarka qoyskaaga ayaa door muhiim ah ka ciyaara caafimaadka iyo faya dhawrka qoyskaaga. Dhakhtarkan caadiyan ayaa qofka koobaad ee aad la xariirayso haddii aad jiran tahay ama u baahan tahay talo caafimaad wuxuuna kuu gudbinayaa khabiir caafimaad, haddii loo baahdo. Hase yeeshee, meelaha qaar oo kamid ah Ontario waxaa adag iad hesho dhakhtar qoys. Halkaan waxaad ka helayaa qaababka qaar oo aad ku bilaabi karto:

Hel adeegga Isku xirka Daryeelka Caafimaadka ee ay bixiso Wasaraada Caafimaadka ee Ontario si aad u hesho dhakhaatiirta qoyska ee deegaankaaga. Ka wac laynka tooska ah ee Iskuxirka Daryeelka Caafimaadka 1-800-445-1822 ama booqo webseedka oo ah ontario.ca ama findlink.at/hc-connect

Adeegso qaybta “Doctor Search” ee webseedka Kuleejka Dhakhaatiirta iyo Dhakhtarada Qaliinka ee Ontario. Booqo cpso.on.ca

La hadal la taliyahaaga dejinta.

Tallooyin ka qaado qoyskaaga iyo asxaabtaada.

CAAFIMAADKA ILKAHA

OHIP ma wada daboosho adeegyada caafimaadka ilkaha, ilkastoo ay dhiibto qarashka adeegyada daryeelka ilkaha qaarkood ee ay qasab tahay in isbitaal uu baxsho.

Telehealth Ontario

Si aad tallo caafimaad oo la xariirta xaalad caafimaad oo aan degdeg ahay uga hesho kalkaaliso, wac 1-866-797-0000 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii. Adeegaan waxaa lagu heli karaa Ingiriis iyo Faransiis iyo 110 luuqadood oo kale. Laynka TTY ayay heli karaan dadka naafada ah: 1-866-797-0007.

Xarunta Caafimaadka ee Bilaa Balanta la Galo

Haddii aadan haysan dhakhtarka qoyska ama aadan sugi karin balanta, booqo rugta caafimaadka ee maxaiga ah ee bilaa balanta la galo. Waa inaad tustaa kaarka OHIP. Ka fiiri rug caafimaad oo kuu dhow Health Care Options: ontario.ca ama findlink.at/hcoptions

Xarumaha Caafimaadka Bulshada


Si aad u hesho xarunta caafimaadka bulshada aadna u hesho xog dheeri ah booqo: health.gov.on.ca ama findlink.at/healthcare

Caafimaadka ilkaha

Hel adeegga Hel Dhakhtarka Ilkaha oo ay bixiso Ururka Caafimaadka Ilkaha ee Ontario: youroralhealth.ca ama findlink.at/013

Caymiska caafimaadka ee Gaarka loo leeyahay

Ka fiiri barta oonleena ah ee Yellow Pages yellowpages.ca





Waxaad u heli kartaa adeegyada daryeelka ilkaha qaarkood oo bilaash ah carruurtaada kayar da'da 17 aadna ka helayso xarunta caafimaadka dadwaynaha ee deegaankaaga. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan Barnaamijka Healthy Smiles Ontario, wac [1-800-268-1153](tel:1-800-268-1153) ama booqo Wasaarada Caafimaadka oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/smiles-ont



WAXYAABAHA AAD KA FAKARAYSO

Sidee ayaan ku helayaa dhakhtarka qoyska?

Sidee ayaan ku helayaa dhakhtarka ilkaha?

Xagee ayay ku taalaa xarunta caafimaadka ee iigu dhow ee bilaa balanta la galo?

Xagee ayaan ka helayaa xarunta caafimaadka bulshada ee iigu dhow?

Waa maxay adeegyada aysan daboolayn OHIP?

Waa meeqa qiimaha adeegyada aysan daboolin OHIP?

Shirkada aan u shaqeeyo ma bixisaa caymis caafimaad oo daboolaaya qarashaadka dhakhtarka ilkaha iyo/ama daawada la ii qoro?

Marka aan u safro meel ka baxsan Canada, OHIO ma bixin doontaa isla qarashaadka caafimaadka ee ay ku dabooشو Ontario?

XAALADAHA DEGDEGA AH EE CAAFIMAADKA

Haddii aad qabto xaalad caafimaad oo degdeg ah, oo khatar ku ah nololaha, ka wac 911 taleefankaaga xili kasta. Waxaa lagugu xiri doonaa shaqaale usoo diri doona gaadiidka gurmada degdega ah goobta aad joogto. Gaadiidka gurmada degdega ah waxaa ka shaqeeya shaqaalaha caafimaadka degdega ah kuwaasoo ku siin kara daawayn degdeg ah. Xarumaha wicitaanka xaalada degdega ah ayaa bixin karta turjumaannada in ka badan 170 luuqadood.

Fadlan ogoow in markasta lagaa rabo inaad bixiso qayb kamid ah qarashka adeegyada gaadiidka gurmada ee lagu siiyay. Si aad xog badan u ogooto booqo: health.gov.on.ca ama findlink.at/ambulance

Waxaad sidoo kale booqan kartaa qolka xaalada degdega ah ee kuugu dhow – kuwaan ayaa caadiyan furan 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii. Haddii aadan haysan caymiska OHIP, waa inaad bixisaa qarashka adeegyo kasta oo lagu siiyay.

TALAALLADA

Ontario ayaa leh barnaamijka talaalka (ama talaal) si looga difaaco dadka waawayn iyo carruurta cudurada kaladuwan. Haddii adiga ama carruurtaada laga talaalay, keen diiwaannada marka aad timaado Ontario.

Haddii adiga ama carruurtaada aysan qaadan talaalka, la hadal dhakhtarka qoyskaaga ama shaqaalaha caafimaadka ee xarunta caafimaadka bulshada si aad u ogaato noocyada talaallada aad u baahan tahay. Waxaad u gayn kartaa diiwaanka talaalka dugsiga cunugaaga.



Si aad xog badan uga ogaato barnaamijka talaalka ee Ontario, booqo webseedka Wasaarada Caafimaadka oo ah health.gov.on.ca ama findlink.at/immuneinfo

Welcome to Canada

DARYEELKA CAAFIMAADKA DHIMIRKA

OHIP ayaa dabooasha adeegyada caafimaadka dhimirka ee ay baxshaan dhakhaatiirta dhimirka. Adeegyada ay bixiyaan dhakhaatiirta dhimirka, shaqaalaha bulshada iyo la taliyaasha kale ayaysan daboolayn OHIP ilaa inaad ka qadato maahee wakaalad dawladu maalgeliso sida urur ka shaqeeya caafimaadka dhimirka, isbitaal ama xarun caafimaadka bulshada ah.



Si aad xog uga ogaato adeegyada daryeelka caafimaadka dhimirka ee Ontario, wac Laynka Caawimaada Caafimaadka Dhimirka oo ah [1-866-531-2600](tel:1-866-531-2600) ama booqo connexontario.ca



Si aad u hesho laymanka caawimaada taleefanka lacag la'aanta ah ee dadka qaba xanuunka dhimirka, isticmaala maandooriyaasha ama qaba dhibaatooyinka khamaarka, booqo ConnexOntario: connexontario.ca

MURAAQABADA CAAFIMAADKA

Kahor intaadan imaan Canada si aad u degto, waxaa laga yaabaa inaad marto baaritaan caafimaad kaasoo aad ku ogaatay in aad u baahan doonto baaritaan kale marka aad timaado. Waxaa loo yaqaanaa muraaqabada caafimaadka waxaana lagu xaqiijiyaa inaad caafimaad buuxa qabto.



Haddii sidaan kugu dhacdo, waa inaad la xariirtaa maamulka caafimaadka dadwaynaha ee deegaankaaga 30 maalmood gudahood kadib marka aad soo gasho Ontario. Haddii aadan sidaan samayn, dhibaato ayaa kaa qabsan karta shaqadaada sharci helida wadanka. Si aad u hesho goobta waaxda caafimaadka dadwaynaha ee deegaankaaga, booqo health.gov.on.ca ama findlink.at/ph-units

Welcome to Canada

ADEEGYADA MACMIILKA

Waxyaabo fudud ayaa isbadel wayn abuuri kara. Helitaanka taleefanka, gelitaanka interneedka iyo helitaanka meesha aad ka iibsanaayo adeegyada raashinka ayaa muhiim u ah hawshaadada degista wadanka.

WACYI GELIN MACAAMIISHA

Suuqa Ontario waxaa ka buuxa badeecooyin iyo adeegyo. Sharciyada difaacaaya macaamiisha iyo ganacsiyada ayaa maamulaaya inta badan hawlaha ganacsiga ee macaamiisha.

Dawlada federaalka, gobalka iyo kuwa deegaannada ayaa si wadajir ah u sameeyay Buug-gacmeedka Macaamiisha Canada si lagaaga caawiyo inaad noqoto macmiil xog badan haysta. Buug-gacmeedka waxaad ka helayaa xog ku saabsan mawduucyada sida dukaameysiga oonlaynka ah, bangida, guriyaynta iyo dayactirada guriga. Wasaarada Dawlada iyo Adeegyada Macaamiisha ayaa masuul ka ah sharciyada difaacaaya macaamiisha ee gobalka Ontario.



Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, booqo ontario.ca/consumerprotection ama wac **1-800-889-9768**.



ADEEGYADA TALEEFANKA IYO INTERNEEDKA

Magaalooyinka waawayn, waxaa jira dookhyo badan oo aad ku helayso taleefanka iyo interneedka. Dookhyo kooban ayaad ka helayaa deegaannada miyiga ah.

Shirkado badan ayaa bixiya khadka interneedka, ama iskudar, taleefankaaga (kan guriga iyo kan gacanta), interneed iyo adeegyada fiilada oo ku wada jira hal adeeg oo qiimo jaban. Qorsheyaasha qoyska ayaa sidoo kale ah qaab wanaagsan oo lagu helo khadka adeegyada taleefanka gacanta laguna badbaadsado lacagta. Kaararka meelaha fogfog iyo wicitaanka wadamada dibada ayaa sidoo kale ah dookhyo la heli karo.

Akhri oo fahan dhammaan xogta heshiiska kahor intaadan saxiixin.

Maktabado badan oo kuwa dadwaynaha ah kuna yaala Ontario ayaa baxsha adeegga interneedka oo bilaash ah adoo ku galaaya kaarkaaga maktabada. Sidoo kale, haddii aad horey u haysatay kumbuyuutar laabtoob ah oo ku shaqeeya khadka wireleska, waxaad geli kartaa goobaha baxsha khadka interneedka wirelesska ah (oo sidoo kale loo yaqaano Wi-Fi hotspots), sida goobaha qaxwada iyo maqaayadaha.

ADEEGGA BOOSTADA

Boostada Canada ayaa ah adeegga boostada ee qaranka oo leh xarumaha tafaariiqda oo ku yaala inta badan magaaloyinka, caasumadaha iyo deegaannada miyiga ah. Waxaad u diri kartaa kana heli kartaa boostooyinka goobahaan.



Sidoo kale waxaad maamuli kartaa aadna dhiibi kartaa qarashaadka si oonleenka ah adoo adegsanaaya boostada oonlaynka ah. Booqo epost.ca/service/landingPage.a

IIBSASHADA CUNTO

Dukaannada adeegga cuntada ayaa leh dookhyo badan oo cunto cusub iyo badeecooyinka kale ee adeegga ah. Waxaad sidoo kale cunto ka iibsan kartaa dukaannada yaryar ee tafaariiqda (kuwaasoo badanaa ka qaalsan meelaha kale) loona yaqaano dukaannada xaafadaha, ama dukaannada yaryar ee khudaarta iyo miraha, kawaannada iyo goobaha lagu dubo buskudka. Goballo badan, waxaad ka iibsan kartaa cuntooyinka maxaliga ah suuqyada beeraleeyda.



Baahiyaha Cuntada ee Degdega ah

Haddii aadan iibsan karin cunto, waxaad cunto bilaash ah ka helayaa kaydka cuntada ee maxaliga ah. La hadal la taliyahaaga dejinta ama wac **Feed Ontario** oo aad ka helayso



416-656-4100. Booqo feedontario.ca



Si aad u hesho la taliyaha dejinta, booqo settlement.org

ABAAL MARINTA

Dadka ayaa badanaa siiya lacag abaal marin ah shaqaalaha u adeegga ee ka shaqeeya maqaayadaha, baararka, hudheellada iyo tagaasida. Lacagta abaal marinta ah maaha qasab, laakiin waa qaab aad ku tusayso abaalka aad uga hayso qofka adeegga wanaagsan.

Abaal marinta ayaa badanaa ah 10 ilaa 15 boqolkiiba lacagta adeegga.

Buug-gacmeedka Ilaalinta Macaamiisha

ontario.ca/consumerprotection
1-800-889-9768

Boostada Canada

canadapost.ca
1-866-607-6301

Adeegyada Taleefanka iyo Interneedka

settlement.org ama
findlink.at/dailylife

Suuqyada Beeraleeyda

farmersmarketsontario.com





GURIYAYNTA

Guryaha ayaa ah waxa koobaad ee ay ka fakaraan dadka ku cusub wadanka: goob raaxo leh, oo qiimo jaban oo aad hooy ka dhigato ayaa qayb muhiim ah ka ah degista wadaka.

GURYAHA KU MEEL GAARKA AH

Marka aad timaado Canada, waxaad u baahan kartaa goob ku meel gaar ah oo aad ku noolaato inta aad raadinayso guri kamid ah dabaq, guri filo ah ama guri kale oo aad kiraysato ama iibsato. Albeergadu waa meel qiimo jaban oo aad joogi karto badelka aad joogi lahayd hoteel. Hudheellada ayaa ku siinaaya qolal gaar kuu ah ama sariiro yaala qol wayn oo aad la wadaagi karto dadka kale. Sidoo kale waxaad wadaagaysaan musqusha iyo jikada. Si aad u hesho albeergo ama hudheel:



Booqo Yellow Pages: yellowpages.ca

- Ka raadi interneedka webseedka dalxiiska ee magaallada ama deegaanka aad degi doonto kadibna akhri liiska guryaha aad heli karto.
- libso buuga tasmada dalxiisaha ee Canada kaasoo aad ka helayso liiska huteellada iyo albeergooyinka.

Welcome to Canada

NOOCYADA GURYAHA KU TAALA ONTARIO

- Guri kiro ah - hal, labo- ama sadex qol oo ku dhex yaala dhisme ama guri; guryaha singallada ah ayaa leh hal qol oo noqonaaya fadhiga iyo qolka jiiifka. Dhammaan guryaha dabaqyada ayaa leh jiko iyo musqul.
- Qol kiro ah - guryaha waawayn ayaa mararka qaar loo qaybiyaa qolal kaladuwan oo gaar ah oo laga kireeyo shaqsiyaad wadaagaaya jikada iyo musqusha; waxaa mararka qaar loo yaqaanaa guryaha qolalka la kireeyo.
- Dabaqyada (condo) -dabaqyada intooda badan waa dhismeyaal dhaadheer oo leh guryo badan. Mulkiilaha ayaa baxsha qarashka bilaha ah ee adeegyada dayactirka.
- Guri - guryaha filooyinka ah waa guryo gidaar ku wareegsan yahay; guryaha filooyinka nuska ah waa guryo darbi la wadaaga guri kale hal gees; guryaha aqallada ah ayaa wadaaga darbida labada dhan ba.

Welcome to Canada

KIRADA



Qaabka ugu badan ee lagu helo guri kiro ah waa inaad eegto xayiisiinnada gaarka ah ee wargeyska bulshadaada: newspaperscanada.ca

Waxaad sidoo kale

- Ku wareegi kartaa xaafada aad doonayso si aad u raadiso boorarka "Guri Banaan" ama "Kiro ah" oo ku dhagan dhismeyaasha.
- Waydii saaxiibadaa, qaraabada iyo dadka kula shaqeeya.
- Akhri boorarka tilmaamaha ee ku dhagan maktabadaha, dukaannada adeegga iyo xarumaha bulshada.



Booqo viewit.ca



Si aad xog badan uga ogaato guryaha kirada ah ee ku yaala Ontario, booqo webseedyada ku qoran qaybta xogta ee ee geeska bogga.

Qiimaha kirada guryaha ayaa kaladuwan gobalka oo dhan. Si guud, goobaha magaalooyinka waawayn ayay guryahoodu ka qaalsan yihiin magaalooyinka ama xaafadaha yaryar. Waxaa jiri kara farqiyo waawayn oo u dhexeeya xaafadaha ku wada yaala magaalooyinka waawayn sida Toronto. Inta badan khubarada Canada ayaa ku talinaaya inaad ku bixin wax ka badan 30 boqolkiiba dakhligaaga kirada guriga.

SAXIIXIDA HESHIISKA KIRADA

Mulkiileyaasha guryaha oo badan ayaa kaa doonaaya heshiiska kirada, kaasoo ah heshiis sharci ah. Heshiiskaaga kiradu waa inuu sheegaa muddada heshiiska kiradu soconaa (badanaa waa 12 bilood), cadadka kirada iyo waxa lagu dari karo kiradaada sida qarashka baakinka, fillada, korontada ama gaaska.

Qaar badan oo ah mulkiileyaasha guryaha ayaa kaa doonaaya lacagta damaanada kirada ah oo u dhiganta kirada hal bil. Lacagta damaanad ah ayaa loo aqoonsanayaa inay tahay kirada bisha ugu danbaysa ee aad daganaanayso guriga.

BIXINTA KIRADA

Caadiyan waxaad dhiibaysaa kiradaada maalinta koowaad ee bil kasta adoo ku dhiibaaya qaababkaan midkood:

- Kaash – xaqiiji inaad hesho risiidka cadadka buuxa.
- Jeegaga lagu diro boostada – jeegaga ay ku qoran tahay taariikhda aan la gaarin, kuwaasoo aan lacagta lagala bixi karin ilaa taariikhdaas la gaaro. Mulkiilaha gurigaaga ayaa ku waydiin kara jeegaga aan la gaarin taariikhdooda oo daboolaa mudada aad kirada ku daganaan doonto.
- Jeegaga la xaqiijiyay – jeegaga uu damaanad qaaday bangigaagu. Mulkiilaha gurigaaga ayaa kaa codsan kara in kiradaada bisha koowaad iyo bisha ugu danbaysa la xaqiijiyay.

- Lacag la bixida ootomaatiga ah – waxay kuu sahlayaa inaad lacagaha si otomaatig ah uga bixiso koontadaada uguna dirto akoon kale.
- Iimeelka ku diri lacagta – waa qaab lacagta toos loogasoo diro akoonka bangi looguna diro mid kale adoo adeegsanaaya iimeelka, adeegsanaayana adeegga oonlaynka ah ee baanka.

 Welcome to Canada

KIRADA" XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADKA

Sharciga Kireysteyaasha Guryaha Xaafadaha (*Residential Tenancies Act, RTA*) ayaa ah sharciga maamula nidaamka guryaha Ontario. Sharcigaan waxaa ku jira dhammaan xeerarka mulkiileyaasha guryaha iyo kireysteyaashu ay qasab tahay inay ku dhaqmaan, ayna ku jiraan inta jeer iyo cadadka mulkiiluhu kordhin karo kiradaada iyo mudada ogeysiiska ay tahay inuu ku siiyo mulkiilaha gurigaagu marka uu doonaayo inaad gurto.



Si aad u akhrido xogta RTA, booqo webseedka Wasaarada Arimaha magaallada iyo Guryaha ontario.ca ama findlink.at/rtact



Si aad u hesho xog ku saabsan sharciyada mulkiileyaasha guryaha iyo kireysteyaasha ay qasab tahay inay ku dhaqmaan, La xariir Golaha Mulkiilaha Guryaha iyo Kireystaha oo aad ka wacayso [1-888-332-3234](tel:1-888-332-3234) ama booqo sjo.gov.on.ca/lfb

GURYAHA DAWLADU TAAGEERTO

Inta badan magaalooyinka Ontario ayaa leh qaar kamid ah guryaha ay dawladu taageero (oo badanaa loo yaqaano kuryaha kaalmada la siiyo), kuwaasoo qiimaha kiradu ku xiran yahay dakhligaaga. Muddada sugitaanka ee guryaha noocaas ah ayaa dheeraan karta - mararka qaarna waa sanado badan.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan guryaha la kaalmeeyo ee deegaankaaga, la hadal la taliyahaaga dejinta.

Ontario Ministry of Municipal Affairs & Housing

Wasaarada Arrimaha Magaalooyinka iyo Guryaha ee Ontario Ka akhri istaraatiijiyadaha guryaha ee wasaarada barta ontario.ca ama findlink.at/ont-mmah

Canada Mortgage & Housing Corporation

Shirkada Kirada Guryaha iyo Guryaha ee Canada Akhri Kireysiga Gurigaaga Koobaad Gudaha Canada: Waxa ay tahay Inay Ogaadaan Dadka Wadanka Ku cusub: cmhc.ca ama findlink.at/cmhcnc

Settlement.org

Hel xogta faahfaahsan ee ku saabsan guryaha Ontario: settlement.org ama findlink.at/housinginf





WAXYAABAHAA AAD KA FAKARAYSO

Ma jiraan guryaha iskaashatada khayriga ah oo ku yaala aaga aan doonaayo inaan dego? Sidee ayaan ku codsanayaa?

Sidee ayaan ku geli karaa liiska sugayaasha guryaha dawladu kaalmayso?

Haddii aan go'aansado inaan guri iibsado, bangi ee ama midawgee daynta ayaa i siinaaya lacagta daynta guryaha?

Haddii aan go'aansado inaan guri iibsado, lacag intee dhan ayaan u baahan nahay inaan u kaydiyo bixinta daynta?

Waa maxay qarashaadka ku jira kiradeyda; qarashka kulayliyaha; qarashka hawo sifeeyaha; qalabka korontada, sida talaagada iyo shoolada?

GURYAHA ISKAASHATADA KHAYRIGA AH (NON-PROFIT CO-OP HOUSING)

Guryaha iskaashatada waxaa leh dadka ku nool deegaanka. Kirooyinka guryaha iskaashatada khayriga ah ayaa badanaa la qiimo jaban sida caadiga ah. Xubnaha iskaashatada ayaa laga doonayaa inay gacan ka gaystaan maamulka iyo ilaalinta guryaha iskaashatada. Badanaa muddo dheer ayaa la sugaa helitaanka guryaha iskaashatada - caadiyan, waa labo ilaa afar sano. Si aad u hesho liiska guryaha iskaashatada khayriga ah ee deegaankaaga, ka raadi interneedka adoo adeegsanaaya erayada baarista ee Non-Profit Co-op Housing.



Si aad u hesho guryaha iskaashatada ee deegaankaaga, booqo findlink.at/co-op

Welcome to Canada

IIBSASHADA GURI

Iibsashada guri ayaa u baahan qorsheyn, marka waxaa haboon inaad ku biloowdo aruurinta xog sida ugu dhakhsaha badan.



Dadka marka koobaad iibsanaaya, akhri tusmada Shirkada Kirada Guryaha iyo Guriyaynta ee dadka wadanka ku cusub ee doonaaya inay guri iibsadaan adoo booqanaaya cmhc.ca ama findlink.at/cmhcnc

Marka aad iskudayayso inaad hesho dayn aad guri ku iibsato, inaad tahay qof aan qaan daymeed horey u gelin ayaa muhiim ah. Maadaama aad cusub tahay, waxaa laga yaabaa inaad lahayn taariikhda sumcada daynta oo ay bangida Canada aqoonsan yihiin. Sidaas awgeed, waxaad u baahan tahay inaad biloowdo dhisida sumcadaada daynta sida ugu dhakhsaha badan. La hadal wakiil ka socda adeegga macaamiisha ee baankaaga si laguugu dhiso taariikhda sumcada daynta.

Marka aad diyaar u tahay inaad guri baayacdo, waxaa haboon inaad iibsato guri leh shardiga marsiinta guriga kormeer xirfadyahan uu samaynaayo. Haddii kormeeruhu soo sheego in dayactir qasab yahay, waad joojin kartaa ama waxaad badeli kartaa qiimaha aad ku rabto.

Welcome to Canada

GURYAHA ARDAYDA KULEEJYADA

Jaamacado iyo kuleejo badan ayaa guryo siiya ardaydooda. Si aad u hesho xog dheeraad ah, la xariir waaxda guryaha ee jaamacada ama kuleejka aad doonayso inaad dhigato.

Guryaha jaamacadaha iyo kuleejyada ayay mararka qaar heli karaan dadka aan ardayda ahayn xiliyada xagaaga. Waxay noqon karaan goob dhaqaale oo ay joogaan dadka ku cusub wadanka iyo musaafiriinta

Welcome to Canada

GURYAHA XAALADAHA DEGDEGA AH (HOOYGA)

Hooyga ayaa hooy muddo kooban ah siiya dadka aan haysan guryaha ama dhibaatu ku dhacday. Haddii lagaa saaray gurigaaga ama haddii aad khatar ugu jirto in lagugu xadgudubo gudaha gurigaaga, waxaad tagi kartaa hooy. Lambarada taleefanka ee guryaha xarumaha hooyga deegaanka ayaa ku qoran biloowga buugaaga taleefanka oo ay la socdaan lambarada kale ee xaalada degdega ah. Waxaad sidoo kale wici kartaa 211.

Welcome to Canada

GURYAHA WAAYEELKA



Waxaad ka helayaa guryaha deegaanka ee dawladu taageerto ee waayeelka Bogaga Buluuga ah ee buugaaga taleefanka. Si aad u hesho guryaha gaarka ah ee dadka waayeelka ah, ka fiiri Yellow Pages ama booqo yellowpages.ca



Xog ku saabsan adeegyada kaladuwan ee waayeelka, ayna ku jiraan guryaha, Wasaarada Waaxyeelka iyo Helitaanka Adeegyada ee Ontario oo aad ka wacayso [1-888-910-1999](tel:1-888-910-1999) ama booqo ontario.ca ama findlink.at/seniorguid

XEERKA XUQUUQDA AADANAHA IYO GURYAHA EE ONTARIO

Sida uu qabo Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Ontario, laguulama dhaqmi karo si cadaalad daro ah sabab la xariirta isirkaaga, asalkaaga, meesha aad ka timid, midabkaaga, qoomiyada, muwaadinimada, diinta, da'da, jinsiga, dookha galmada, diiwaanka danbiyada, xaalada guurka, xaalada lamaanaha qaniisnimada, xaalada qoyska ama naafada.



Si aad u hesho xog badan oo ku saabsan xuquuqahaaga, booqo Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Ontario oo aad ka helayso ohrc.on.ca ama findlink.at/ohrhousing



KA QAYBGALKA BULSHADA

Barnaamijyada bulshada iyo dalxiiska ayaa kaa caawin kara la kulanka dadka, kobcinta xirfadaha luuqada iyo inaad ku baashaasho nashaadada xiliga nasiinada. Wax ka ogoow nashaadaadka bulshada ee aad heli kartaan adiga iyo qoyskaagu.

XARUMAHA NASIINADA EE BULSHADA

Magaallo kasta oo ku taala Ontario ayaa leh barnaamijyada bulshada iyo xarumaha nasiinada ee bulshada. Dhammaan xarumaha ayaa leh goobo ay kooxaha bulshadu ku kulmaan. Xarumo badan ayaa sidoo kale leh goobaha kabaha taayirada leh, barkadaha dabaasha, jiimamka iyo xarumaha ciyaaraha. Barnaamijyada iyo xarumaha ayaa ah kuwo lacag la'aan ah ama qiimo jaban.

Si aad xog badan uga ogaato nashaadaadka iyo barnaamijyada lagu bixiyo xarunta nasiinada ee deegaankaaga, la hadal la taliyahaaga dejinta, wac 211, fiiri Bogaga Buluuga ah ee buugaaga taleefannada ama ka raadi interneedka adoo adeegsanaaya erayada *Community Recreation Centre +Magaca Magaaladaada*.

MAKTABADHA DADWAYNAHA

Maktabada dadwaynaha ee deegaankaaga, waxaad ka helayso buugaaga, CD yo, DVD yo, joornaallo iyo wargeyso ku qoran Ingiriis iyo luuqado kale. Inta badan maktabadaha ayaa sidoo kale bixiya adeegga interneedka oo bilaash ah. Maktabadaha ayaa baxsha barnaamijyo kaladuwan oo loogu talagalay dadka waawayn iyo carruurta labadaba, ayna ku jiraan naadiyada akhrista iyo sheekada, casharada luuqada ee dadka wadanka cusub iyo akhrisyada ay sameeyaan qoraayaasha buugtu. Maktabadaha qaarkood ayaa sidoo kale bixiya xogta shaqada iyo taageerooyin



Si aad u hesho maktabada dadwaynaha ee deegaankaaga, booqo Wasaarada Hidaha, Ciyaaraha, Dalxiiska iyo Dhaqanka: ontario.ca ama findlink.at/opl

Si aad u hesho kaarka maktabada, waxaad u baahan tahay hal aqoonsi oo rasmi ah (baasaboora ama ruqsada darawalka) iyo cadaynta ciwaankaaga (sida taleefanka, qarashka korontada ama fiilada).

GOOBAHA CIBAADADA

Sida ku cad Xeerka Xuquuqaha iyo Madax Banaanida, dadka reer Canada ayaa xor u ah ku dhaqanka diintooda. Inkastoo Ontario tahay bulsho cilmaani ah, dadka reer Ontario ayaa diintooda ku muujiya jameecooyinka kaniisadaha, macaabida yuhuuda, masaajida, macbadyada iyo goobaha kale ee cibaadada.

Ka fiiri goob cibaado uu kuu dhow adoo ka baaraaya interneedka adeegsanaayana erayada *Places of Worship +Magaca Magaaladaada*.

MUTADAWACNIMADA

Ugu deeqida waqtigaaga hawl u qalanta ayaa ah qaab wanaagsan oo aad kula kulmayso dadka aadna ku baranayso bulshadaada. Mutadawacnimada ayaa sidoo kale qayb muhiim ah u ah raadinta shaqadaada, maadaama aad helayso xariiro muhiim ah aadna ku darsan karto khibradaada shaqada. Ururada qaar ayaa kaa codsan kara inaad marto baaritaanka shaqsiyada ee booliiska kahor intaysan aqbalin inaad mutadawac ka noqoto.



Si aad xog badan uga ogaato mutadawacnimada aadna ku hesho xarun mutadawiciinta oo ku taal deegaankaaga, booqo Shabakada Xarunta Mutadawacnimada ee Ontario oo aad ka helayso ovcn.ca



Booqo Wasaarada Carruurta, Bulshada iyo Adeegyada Bulshada (Ministry of Children, Community and Social Services): ontario.ca ama findlink.at/mci-active

Waydii la taliyahaaga dejinta fursadaha mutadawacnimada ee ka jira deegaankaaga.

Wac 211



GAADIIDKA

Haddii aad u baahan inaad shaqada aado, aad soo maro xaafad cusub ama aad carruurtaada gayso dugsi, iskaga gooshida baladka ama magaaladaada ayaa muhiim u ah degista deegaankaaga.

Ruqsada Darawalka

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan qaadashada ruqsada darawalka ee Ontario, booqo drivetest.ca ama findlink.at/driverinfo

Xarumaha Imtixaanka Darawalka

Ka fiiri xarunta imtixaanka darawalka ee deegaankaaga buugga taleefanka ee Yellow Pages, booqo yellowpages.ca ama booqo barta DriveTest oo ah drivetest.ca ama findlink.at/testcentre

Buug-gacmeedka Darawalka

Akhri xeerarka wadada oo u diyaar garoow imtixaanka qoraalka ah adoo booqanaaya ontario.ca ama findlink.at/dhandbook

Waxaad ka iibsana kartaa nuqulka qoraalka ah ee buug-gacmeedka xarun kasta oo samaysa imtixaanka darawalka iyo dukaanno badan oo kuwa tafaariiqda ah.

Baaskiil wadista iyo Badqabka

Ka wac ServiceOntario 1-800-267-8097 ama booqo ontario.ca ama findlink.at/cycling

GAADIIDKA DADWAYNAHA

Magaalooyinka waawayn ee ku yaala Ontario ayaa leh nidaamyada gaadiidka dadwaynaha oo si fiican u hormarsan oo ay ku jiraan basaska, tareennada, hoomeeyada iyo tagaasida. Waxaa ka jira nidaamka gaadiidka lacagtooda la bixiyo marka aad fuulayso gudaha Ontario kuwaasoo qofka rakaabka ah uu ku bixin karo qarashka lacag kaash ah ama uu adeegsan karo kaarka PRESTO kaasoo adeegsada tignooloojiyada kaarka casriga ah.

PRESTO waa nidaam lacag bixin elektarooniga ah oo ka dhigaaya ku safrida gaadiidka mid dhakhso ah oo fudud asagoo meesha ka saaraaya baahida loo qabo tigidhada, tookennada, risiidyada baska ama lacagta kaashka ah. PRESTO ayaa ka shaqeeya dhammaan adeegyada gaadiidka maxaliga ah ee Aaga Greater Toronto and Hamilton (GTHA) iyo Ottawa, kaasoo ka dhigaaya bixinta qarashka bas raaca mid fudud, raaxo leh oo amaan ah.

Si aad u hesho xog dheeraad ah booqo prestocard.ca ama xog ka ogoow gaadiidka dadwaynaha ee aagaaga, akhri Bogaga Buluuga ah ee buugaaga taleefannada; waxaad sidoo kale booqan kartaa Wasaarada Gaadiidka oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/transit

PEEDAABTA GAADIIDKA DADWAYNAHA

Eedaabta ayaa laga wadaa dabeecada wanaagsan ee bulshada dhexdeeda. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan eedaabta gaadiidka dadwaynaha, fadlan akhri Kusoo Dhawoow Canada.

TAGAASIDA IYO GAARIYAASHA LA ISLA RAACO

Inta badan deegaannada Ontario, waxaad kiraysan kartaa tagsi ama waxaad adeegsan kartaa aababka moobiilka ee shirkadaha tagaasida si ay kuu qaadaan kuuna geeyaan meesha aad u socoto. Tagaasida ayaa noqon kara kuwo qaali ah, marka xaqiiji inaad waydiiso darawalka qiimaha safarka kahor intaadan bilaabin safarka

Si aad u hesho shirkad tagasi oo maxaliga ah, ka fiiri Yellow Pages ka buugaaga taleefanka ama booqo yellowpages.ca

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada tagsiga booqo canada.ca ama findlink.at/rideshr

GAARI KIRO AH

Haddii aadan lahayn gaari, kireysiga gaari ayaa aad kuugu haboon. Si taxadar leh u akhri heshiiska kirada kahor intaadan saxiixin. Sidoo kale waa qasab inaad haysato caymisi.

Qaar badan oo kamid ah magaalooyinka waawayn, waxaad ku biiri kartaa adeegga basaska sida Zipcar oo kuu sahlaya inaad kiraysato gaari muddo kooban si aad hawlo kooban usoo qabsato. Adeegyadaan ayaa caadiyan leh goobaha qaadista iyo dejinta oo aad ku qanci karto.

Si aad u hesho shirkadaha gaariyaasha kirada ah ee maxaliga ah iyo adeegyada basaska, ka fiiri Yellow Pages ka buugaaga taleefanka maxaliga ah ama booqo yellowpages.ca

QAADASHADA RUQSADAADA DARAWALKA

Haddii aad haysato ruqsada darawalka oo kasoo baxday wadankaagii hooyo, waxay sii shaqayn doonaa ilaa 60 maalmood kadib markaad soo gasho Canada. Intaas kadib, waa inaad qaadataa ruqsada darawalka ee Ontario.

Taariikhdaada hore ee gaari wadista ayaa la tixgeelin doonaa marka aad codsanayso ruqsada Ontario.


Hase yeeshee, haddii aad horey u lahayd ruqsad iyo haddii kaleba, waxaad u baahan kartaa inaad ku baasto imtixaan qoraal ah oo la xariira xeerarka wadooyinka ee Ontario iyo inaad gasho hal ama labo imtixaanka tijaabada wadada ah.

Ruqsada darawalka waa aqoonsi rasmi ah.


Haddii aadan doonayn ruqsada darawalka aadna doonayso inaad hesho aqoonsi rasmi ah,

Waxaad codsan kartaa Kaarka Aqoonsiga Ontario ee Sawirka leh. Kaarkaan ayaa sidoo kale ah aqoonsi rasmi ah.





Si aad u codsato waxaad u baahan tahay inaad keento aqoonsi rasmi ah oo muujinaaya magacaaga sharciga ah, taariikhda dhalashada iyo saxiixaaga. Waa inaad sidoo kale buuxisaa foomka codsiga.

 Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo serviceontario.ca ama findlink.at/photoid

XEERARKA GAARI WADISTA

Qanaaxyada jebinta xeerarka gaari wadistu waa kuwo culus. Waa kuwaan qaar kamid ah sharciyada ugu muhiimsan:

- Waa inaad haysataa ruqsada darawalka si aad gaari u wado waana inaad wadato markasta.
- Waa inaad lahaato caymiska gaariga.
- Waa inaad haysataa cadaynta mulkiyada gaariga - ku dhex hay gaariga.
- Marna haku kaxayn xawaare ka dheereeya xadka lasoo dhajiyay. Ganaaxyada xawaaraha ayaa aad u sareeya waxayna keeni karaan qarashaadka caymiska oo tiro badan.
- Adiga iyo dhammaan rakaabkaagu waa inaad xirataan suumanka amaanka.
- Ilmaha yaryar iyo carruurta waa in lagu fariisiiyaa kursiga gaariga ee gaarka u ah.
- Marna ha cabin khamri adoo gaari wadaaya. Haddii booliisku ku qabtaan adoo gaari wada xili heerka khamriga jirkaagu ka badan yahay xadka sharciga ah, ganaaxyada ayaa aad u daran.
- Ha isticmaalin taleefanka adoo gaari wada, ilaa inaad ku hadli karto maahee adiga oo aan gacan ku qaban.
- Marna ha adeegsan qalabka isgaarsiinta iyo madadaallada oo gacanta lagu qabto inta aad wado gaariga ilaa inay ku dhagan tahay maahee ama lagu sameeyay dhashka gaariga.
- Cunto cunista, cabitaanka, shanlaysiga, sigaar cabista, akhrinta iyo soo qabsashada alaabaha ayaa keeni kara gaari wadis dayac ah ama khatar badan.



Marna ha wadin gaari adoo isticmaalaaya xashiish, Wadista gaari adoo ay ku naafaysay xashiis waa arin sharci daro ah oo khatar badan. Waxaa jira ganaaxyo daran oo lagu mutaysan karo ruqsadaadana waa la baabi'in karaa. Si aad xog badan u oogoto booqo ontario.ca/page/cannabis-and-driving

 Welcome to Canada

CAYMISKA

Ontario ayaa leh iskudarka nidaamka caymiska ee qofku uusan khaladka lahayn iyo kan uu khaladka leeyahay. Tani waxay ka dhigan tahay in shirkadaada caymisku ay bixinayso qarashka waxyeelo kasta oo ku dhacda gaarigaaga, haddii waxyeeladu tahay khaladkaaga ama khaladka darawalka kale.



Xog badan ka ogoow caymiska aadan khaladka lahayn adoo booqanaaya Laanta Caymiska ee Canada: ibc.ca ama findlink.at/nofault

Qiimaha caymiska gaariga ayaa kaladuwan shirkadaha kaladuwan. La xariir shirkado kaladuwan kadibna waydii inay kuu sheegaan qiimaha, ama la xariir dalaalka caymiska, kaasoo iskudayi doona inuu kuu keeno shirkada ugu qiimo macquulsan. Ka fiiri xogta meelaha lagala xariiro dalaallinta iyo shirkadaha caymiska barta yellowpages.ca ama ka baar Interneedka.

BAASKIIL WADISTA

Wadista baaskiil ayaa ah qaab wanaagsan oo aad kusoo mari karto deegaankaaga cusub. Magaalooyinka qaarkood ayaa marinnada baaskiilka u sameeyay dadka wata, qaar badana waxay leeyihiin wadiiqooyinka baaskiilka ee goobaha nasiinada. Marka aad tahay qof baaskiil wata, waxaa lagu tixgelinayaa inaad gaari wadato sida ku cad Sharciga Wadooyinka Waawayn ee Ontario. Tani waxay ka dhigan tahay in ay qasab tahay inaad ku dhaqanto sharciyada wadooyinka.

Please note that, by law, every cyclist under the age of 18 must wear an approved bicycle helmet.

WAXYAABAHA AAD KA FAKARAYSO

Haddii aan doorto inaan qaadani ruqsada darawalka ee Ontario, waa maxay nooca aqoonsiga sawirka leh ee dawladu samayso ee aan adeegsan karo badelkiisa?

Fadlan ogoow: ma haysan kartid labadaba ruqsada darawalka iyo kaarka sawirka leh ee Ontario – waa inaad doorataa midkood.

Lacag intee dhan ayay tahay inaan ku baxsho iibsashada gaari cusub ama mid duug ah? Waa meeqa qiimaha caymiska meeqa ayaanse ku bixinayaan diiwaan gelinta iyo ruqsada gaariga?



XUQUUQDA SHARCIGA AH IYO ADEEGYADA

Labadaba sharciyada federaalka iyo gobalka ama deegaanka ayaa ilaalinaaya xuquuqda shaqsiga ah iyo xoriyadaha sida madax banaanida iyo sinaanta. Nidaamkeena sharciga ayaa lagu saleeyay xeerka sharciga iyo mabaadii'da dimuqraadiyada.

THE CANADIAN CHARTER OF RIGHTS AND FREEDOMS

Xeerka Xuquuqaha iyo Xoriyadaha ee Canada (*Canadian Charter of Rights and Freedoms*) ayaa ilaalinaaya isla xuquuqaha iyo xoriyadaha labadaba ragga iyo dumarkaba:

- Xoriyada muujinta waxyaabaha aad aaminsan tahay iyo fikradahaaga.
- Xoriyada aad u leedahay la shaqaynta
- Qofka aad doonto iyo inaad la kulanta dadka kale si nabadgalyo leh.
- Xoriyada ku dhaqanka diintaada.
- Xaqa aad u leedahay inaad meeshaad doonto uga noolaato Canada.
- Xaqa aad u leedahay in lagaa difaaco xiritaanka ama xabsi dhigista sharci darada ah ama cadaalad darada ah, iyo xaqa aad u leedahay hanaanka sharciga. Tani waxay ka dhigan tahay in dawlada ay qasab ku tahay inay qadariso dhammaan xuquuqdaada sharciga ah.
- Xaqa aad u leedahay difaaca loo siman yahay iyo faa'iidada loo siman yahay ee sharciga adigga oo aan lagu takoorin sabab la xariirta isirkaaga, wadanka ama qoomiyada aad kasoo jeedo, midabkaaga, diintaada, jinsiga,
- Da'da ama naafada dhimirka ama jirka.
- Xaqa aad u leedahay inaad adeegyo ka hesho dawlada federaalka ah kuwaasoo ku baxaaya midkood Ingiriis ama Faransiis.



Ka akhri Xeerka bogga Waaxda Cadaallada ee Federaalka: [justice.gc.ca](https://www.justice.gc.ca) ama [findlink.at/constiacts](https://www.findlink.at/constiacts)

[Welcome to Canada](https://www.welcome-tocanada.ca)

THE ONTARIO HUMAN RIGHTS CODE



Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Ontario (*Ontario Human Rights Code*) ayaa ka difaacaaya dhammaan dadka reer Ontario in loola dhaqmi si cadaalad daradaa dhinacyada shaqada, guryaha iyo adeegyada. Waa sharci daro in qofka lagu takooro ama lagu dhibaateeyo sabab la xariirta isirkiisa, asalkiisa, meesha uu kasoo jeedo, midabkiisa, qoomiyadiisa, dookhiisa galmada, diiwaannada danbiyada, xaalada guurka, qaniisnimada, xaalada qoyska ama naafada.

Booqo Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Ontario oo aad ka helayso [ohrc.on.ca](https://www.ohrc.on.ca)

DA'DA QAANGAARNIMADA IYO DA'DA OGOLAANSHO BIXINTA



Gudaha Ontario, da'da qaangaarnimadu waa 18 sano. Xiligaan waa marka qofka sharcian loo tixgelinaayo qof qaangaar ah. Da'da oggolaanshaha galmada waa 16 sano.

Dhammaan falalka galmada ee uusan qofku ogolaan waa danbi. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan da'da ogolaanshaha, booqo [justice.gc.ca](https://www.justice.gc.ca) ama [findlink.at/ageconsent](https://www.findlink.at/ageconsent)



HELITAANKA QAREEN



La taliyaahaaga dejinta ayaa kaa caawin kara helitaanka qareen leh khibradaha aad u baahan tahay.

Akhri Yellow Pages (Bogaga Jaallaha ah) ee buugaaga taleefannada maxaliga ah ama booqo yellowpages.ca

Si aad u hesho liiska qareennada iyo kaaliyaasha ku dhaqan Ontario, booqo bogga Ururka Sharciga ee Canadada Kore iso.ca ama findlink.at/tlsuc

Legal Aid Ontario ayaa siisa adeegyada sharciga dadka danyarta ah. Wac [1-800-668-8258](tel:1-800-668-8258) ama booqo legalaid.on.ca

SOCDAALKA IYO XASHIISKA

Waa sharci inaad xashiiska isticmaasho gudaha Canada. Dawlada Canada ayaa leh xeerar loo dejiyayay ilaalinta badqabka dadka marka ay iibsanayaan ayna isticmaalayaan xashiiska baashaalka.

Waa inaad jirtaa 19 sano ama ka wayn tahay si aad u iibsato, u isticmaasho, u haysato aadna u beerato xashiishka baashaalka waxaadna haysan kartaa ugu badnaan 30 garaam oo xashiiska qalalan ah (ama wax u dhigma) marka aad joogto goobaha bulshada xili gaar ah kuwaasooaad oonleenka uga iibsan karto Dukaanka Xashiiska ee Ontario (OCS) ama dukaan ruqsad ka haysta Gudiga Ciyaaraha ee Ontario (AGCO). Waxaad sigaar ahaan iyo shiishad ahaanba u isticmaali kartaa xashiishka markasta oo la ogol yahay isticmaalka tubaakada. Waa sharci daro inaad xashiis soo geliso xuduudaha caalamiga ah ee Canada. Magaallada aad dagan tahay ayaa lahaan karta xeerar hoose oo maamulaaya isticmaalka xashiishka gudaha magaalada. Si aad u hesho xog dheeraad ah booqo canada.ca

Shaqsiyaadka jebiya sharciga ayaa waajihi kara xukunno danbi sida uu qabo Sharciga Xashiiska ee Federaalka. Sidaas awgeed, dadka daganaanshaha rasmiga ah haysta ayaa lumin kara daganaanshaha, haka dadka daganaanshaha ku meel gaarka ah haysta laga yaabo inay awoodi waayaan inay soo galaan ama sii joogaan Canada.

Ka fiiri xog dheeraad ah oo ku saabsan ganaaxyada canada.ca

Xarunta Taageerada Sharciga ee Xuquuqda Aadanaha

Waxay caawisa aayna matashaa dadka aaminsan in loo gaystay takoor: hrlsc.on.ca

U doodaha Bulshada ee Ontario

Wuxuu caayiyaa dadka dareemaaya in ay si cadaalad daro ah ula dhaqantay dawlada Ontario: ombudsman.on.ca

Cadaallada Ontario

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka sharciga ee Ontario oo ku qoran 12 luuqadood: attorneygeneral.jus.gov.on.ca ama findlink.at/on-justice

Settlement.org

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka sharciga ee Canada iyo adeegyada sharciga: settlement.org ama findlink.at/legal-serv

Sharciga Bulshada Waxbarashada Ontario

Waxay bixisaa xog ku qeexaysa sharciga luuqad fudud si looga caawiyo dadka inay fahmaan ayna ku dhaqmaan xuquuqdooda sharciga ah cleo.on.ca



QORSHAHA DEJINTA

Si aad u hesho nuqulka faahfaahsan ee qorshaha dejinta, fadlan booqo <http://my.orientationontario.ca/content/settlement-planning-tools>

DARYEELKA CAAFIMAADKA

- Booqo xarunta ServiceOntario si aad u codsato kaarkaaga OHIP
- Hel dhakhtarka qoyska
- Libso caymiskaaga caafimaadka saddexda bilood ee ugu horeeya ee aad joogto Canada
- Hel isbitaalka kuugu dhow iyo xarunta caafimaadka ee bilaa balanta la galo

1. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

2. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

3. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

ADEEGYADA MACMIILKA

- Baro dukaannada adeegga iyo suuqyada deegaankaaga si aad u ogaato qiimaha cuntada
- Diyaarso lambarka taleefan lagaala soo xariiri karo
- Baro meesha aad ka geli karto interneedka haddii aad u baahato

1. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

2. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

3. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

GURIYAYNTA

- Raadso guryo ku haboon miisaaniyadaada.
- Fahan xuquuqdaada iyo waajibaadka ku saaran ka kireyste ahaan, haddii aad guri kiraysanayso.
- Qorshayso dhammaan qarashaadka la xariira guryaha, ayna ku jiraan caymiska, adeegyada guriga iyo canshuuraha guriga.

1. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

2. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

3. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

KA QAYBGALKA BULSHADA

- Xog ka ogoow barnaamijyada iyo xarumaha oo aad ka helayso xarunta bulshada ee deegaankaaga.
- Baro meesha ay ku taallo maktabada dadwaynaha ee xaafadaada oo hel kaarka maktabada.

1. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

2. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

3. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____



GAADIIDKA

Baro dookhyada gaadiidka dadwaynaha ee aad ka helayso deegaankaaga.

Codso ruqsada darawalka ee Ontario.

1. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

2. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

3. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

XUQUUQDA SHARCIGA AH IYO ADEEGYADA

1. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

2. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

3. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

WAXBARASHADA IYO TABABARKA

Qaybtaan waxay xog ka bixinaysaa fursadaha waxbarashada iyo tababarka laga bilaabo daryeelka ubadka ilaa waxbarashada heerka ugu danbeeya jaamacada. Sidoo kale waxaad ka baranaysaa waxbarashada dadka waawayn iyo sii wadashada waxbarashada iyo sidoo kale tababarka luuqada.

30

Daryeelka
Carruurta

31

Waxbarashada
Dugsiga Hoose iyo
Sare

33

Waxbarashada
Kuleejka

34

Sii wadista
Waxbarashada

35

Tababarka
Luuqada

36

Qorshaha Dejinta





DARYEELKA ILMAHA

Waxaa jira tiro dookhyada daryeelka ubadka ah (sidoo kalena loo yaqaano daryeelka maalinta) oo ka jira gudaha Ontario. Waxaad ka diiwaan gelin kartaa cunugaaga adeeg sida ugu habboon u anfacaaya qoyskaaga.

DARYEELKA ILMAHA EE RUQSADA LEH IYO KAN AAN RUQSADA LAHAYN

Waxaa jira labo nooc oo daryeelka ilmaha ah oo ka jira Ontario: ruqsad leh (mararka qaarna loo yaqaano rasmiga ah) iyo mid aan ruqsada lahayn (mararka qaarna loo yaqaano kan aan rasmiga ahayn).

Daryeeleyaasha daryeela wax ka badan shan ilmood oo aan qaraabadooda ahayn kana yar toban jir waa inay ruqsad ka haystaan Wasaarada Waxbarashada sida ku cad Sharciga Daryeelka Maalintii ee Ilmaha. Barnaamijyada daryeelka ilmaha ee ruqsada leh waa inay buuxiyaan heerarka gaarka ah ee gobalka.

Daryeelka ilmaha ee aan ruqsada lahayn waa heshiis gaar ah oo u dhexeeya daryeela iyo waalid. Daryeeleyaasha daryeela shan ilmood ama ka yar oo aan ehelkood ahayn ayaan u baahnayn ruqsad.

Bixiye kasta oo baxsha daryeelka ilmaha ayaa leh xeerar gaar ah. Qaarkood ayaa doonaaya in cunugaagu adeegga qaato waqti buuxa. Qaar kale ayaa baxsha daryeelka ilmaha ee waqtiga gaarka ah iyo ilmaha la keeno. Waxaa jiri kara liiska sugitaanka oo dheer, qiimaha ayaana aad u kaladuwan.

WAXYAABAHA AAD KA FAKARAYSO

Waa maxay su'aalaha ay tahay inaan waydiiyo marka aan wareysanaayo adeeg bixiyaha daryeelka ilmaha?

Adeeg bixiyaha cunugaygu ma haystaan saacadaha adeegga oo kaladuwan?

Ma lacag ayaa la iga rabaa maalmaha uusan cunugaygu xarunta joogin?

Maxaa dhacaaya haddii aan kasoo daaho qaadista ilmahayga?



Ka fiiri xog dheeraad ah oo ku saabsan dookhyada daryeelka ilmaha bogga Wasaarada Waxbarashada: findlink.at/childcare ama ontario.ca/page/ministry-education

KAALMAATIYADA DARYELKA ILMAHA



Kaalmaatiyada qaar ayaa la heli karaa si looga caawiyo qoysaska aan awoodin inay baxshaan qarashaadka daryeelka ilmaha. Si aad u ogaato inaad u qalanto iyo inkale iyo sida aad u codsanayso, la hadal la taliyahaaga dejinta ama booqo Wasaarada Waxbarashada oo aad ka helayso ontario.ca/page/ministry-education ama findlink.at/payingchc

XARUMAHA DHALAANKA EE ONTARIO

Xarumaha Dhalaanka ee Ontario oo dawladu maalgeliso, ilmaha jira ilaa lix sano jir ayaa ku ciyaari kara waxna ka baran kara. Waalid ama masuul waa inuu la socdaa ilmaha. Xarumahaan ayaa sidoo kale adeegyo badan siiya waalidiinta. Wax qarash kaagama baxaayo tagista xarumaha.



Si aad u hesho Xarunta Dhallaanka ee Ontario oo kuu dhow, wac



ServiceOntario [1-800-268-1153](tel:1-800-268-1153) ama booqo ontario.ca



WAXBARARASHADA DUGSIGA HOOSE-DHEXE IYO SARE

Cunugaaga ayaa dhigan kara dugsiyada dawlada si lacag la'aan ah. Dugsiyada dawlada ayaa loo qaybiyaa dugsiyada hoose (fasalka birimada ilaa fasalka 8-aad) iyo dugsiyada sare (fasalka 9-aad ilaa 12-aad). Cunugaaga ayaa sidoo kale dhigan kara dugsi gaar loo leeyahay oo aad dhiibayso qarashka dugsiyada gaarka loo leeyahay ee bixiya shahaadooyinka Dugsiyada Sare ee Ontario waxaa kor ka maamusha Wasaarada Waxbarashada ee Ontario.

DUGSIYADA HOOSE-DHEXE IYO SARE

Inta badan carruurta ayaa waxbarashada ka bilaaba fasalka birimada marka ay gaaraan afar ilaa shan sano.

Sida uu qabo sharciga Ontario, carruurta da'aha u dhexeeya lix iyo 18 sano waa inay aadaan dugsiyada.

Dugsiyada sare ayaa u diyaarsha ardayda waxbarashada kuleejka (kuleejka, jaamacada iyo tababarada shaqada) ama waxay baxshaan barnaamijyo sida tababarka xirfada si loogu diyaarsho ardayda inay shaqeeyaan isla marka ay dugsiyada dhameeyaan.

Ilmaha waa in laga diiwaan gashaa dugsiyada maxaliga ah ee deegaankooda ama goleyaasha dugsiyada. Inta badan, ilmaha ayaa dhigan doona dugsiyada ku yaala meesha ay dagan yihiin.

GOLEYAASHA DUGSIGA

Deegaan kasta oo ku yaala Ontario wuxuu leeyahay hal ama ka badan oo goleyaasha dugsiyada ama maamullada dugsiyada oo dawlada maalgeliso. Waxaa jira goleyaasha dugsiyada ee luuqada Ingiriiska iyo Faransiiska dhammaan gobalka. Inta badan goballada ayaa sidoo kale leh golaha dugsiyada Kaatooliga ah oo dawlada maalgeliso.

Xaqiiji inaad taqaano goleyaasha dugsiyada ama maamulka xukuma dugsiyada deegaankaaga. Waxay ku siinayaan dhawr qaab oo aad uga qaybgasho dugsiyada cunugaaga iyo deegaankaaga.

DIIWAAN GELINTA ARDAYDA

Si aad carruurtaada uga diiwaan geliso dugsi markii koobaad, waa inaad la xariirtaa golaha dugsiyada maxaliga ah. Ilmahaaga ayaa laga qaadi doonaa imtaxaan si loo xaqiijiyo heerka ay ka galayaan dugsiyada iyo inay u baahan yihiin taageero dheeri ah, sida casharada luuqada Ingiriiska ama Faransiiska

 Welcome to Canada

Wasaarada Waxbarashada

Ka bilow baaristaada dugsiyada dawlada ee Ontario adoo booqanaaya Wasaarada Waxbarashada: ontario.ca

Settlement.org

Akhri tilmaamaha ku aadan waxbarashada dugsiyada hoose-dhexe iyo sare: settlement.org/ontario/education

Goleyaasha Dugsiyada ee Maxaliga ah

Si aad u hesho liiska dhammaan goleyaasha iyo maamullada dugsiyada ee Ontario, booqo ontario.ca ama findlink.at/boardlist


Waxbarashada Luuqada Faransiiska

Waxbarashada luuqada Faransiiska ayay siiyaan 12 kamid ah goleyaasha dugsiyada carruurta waalidiintoodu ku hadlaan afka Faransiiska. Xog badan ka ogoow ontario.ca ama findlink.at/fsl

ELF Ontario

Si aad u hesho xog ku saabsan dugsiyada iyo xarumaha dhammaan heerarka Canada ee baxsha koorsooyinka af Faransiiska, booqo www.elf-canada.ca





WAXYAABAH AAD KA FAKARAYSO

Taariikhdee ayaan u baahan nahay inaan cunugayga ka diiwaan gasho sanad dugsiiyeedka soo socda?

Carruurtaada ma la qiimeeyay mana la geeyay fasal?

Sidee ayuu cunugaygu ku tagayaa dugsiga? Ma jiraa adeegga baska?

Haddii cunugaygu qabo baahiyaha gaarka ah, waa maxay nooca taageerada ee dugsiyada iyo goleyaasha maxaliga ah ee dugsiga?

Golaha dugsigaygu ma baxshaa waxbarashada Faransiiska? Sidee ayaan ku codsanayaa?

CASHARKA LUUQADA

Ingiriiska – Ardayda qaarkood ayaa bilaabi doona inay bartaan Ingiriisiga markii koowaad marka ay ku biiraan dugsiga hoose-dhexe ama sare. Taageerooyinka luuqada ayay heli karaan ardayda luuqadooda koobaad ay tahay Ingiriisiga.

Faransiiska – Barnaamijyada Faransiiska oo ah luuqada labaad (FSL) ayaa la siiyaa dhammaan ardayda goleyaasha dugsiyada looga hadlo Ingiriisiga.

Barnaamijyada waxaa ku jira:

- Faransiiska Aasaasiga ah - Ardayda ayaa u barta afka Faransiiska maado ahaan.
- Faransiiska la kordhiyay – Ardayda ayaa u barta Faransiiska maado ahaan Faransiiska ayaana ah luuqada casharada ee ugu yaraan hal maado oo kale. Barnaamijyada faransiiska la kordhiyay ayaa badanaa ka biloowda fasalka todobaad.
- Waxbarashada Faransiiska ah – Ardayda ayaa u barta Faransiiska maado ahaan Faransiiska ayaana ah luuqada casharada ee ugu yaraan labo maado oo kale ama ka badan. Barnaamijyada waxbarashada Faransiiska ayaa badanaa ka biloowga dugsiga xanaanada.



Xog badan ka ogoow barnaamijyada FSL oo aad ka helayso Wasaarada Waxbarashada: ontario.ca/page/ministry-education ama findlink.at/onfsl

Barnaamijyada waxbarashada Faransiiska iyo Faransiiska la Kordhiyay ayaan lagu bixin dhammaan dugsiyada dawlada. Si aad u ogaato dugsiyada ku yaala aagaaga ee baxsha barnaamijyadaan, la xariir golaha ama maamulka dugsiga ee deegaankaaga.

Barnaamijyada Luuqada Dhaqanka

Barnaamijyadaan waxay bixiyaan casharo iyo nashaadaad ku baxa luuqado badan lana siiyo ardayda da'aha kaladuwan.

Waxaa badanaa la bixiyaa saacadaha ka baxsan waqtiga caadiga ah ee dugsiga. Waydii dugsiga, golaha dugsiga ama maamulka dugsiga ee deegaankaaga si aad u ogaato dookhyada laga heli karo deegaankaaga.

DUGSIGA BARBAARINTA EE MAALINTA OO DHAN

Dhammaan dugsiyada Ontario ayaa baxsha barbaarinta maalinta oo dhan ee ilmaha jira afar iyo shan sano.

Marka walaidiintu xiiso buuxa u qabaan, dugsiyada ayaa sidoo kale baxsha barnaamijyada kahor iyo kadib dugsiga oo ka biloowda ku dhawaad 7:00 ilaa 9:00 subixii iyo laga bilaabo 3:30 ilaa 6:00 galabtii. Barnaamijyadaan ayaa inta badan la siiyaa ardayda fasalka birimada ee maalinta buuxa dhigta waxaana lagu baxshaa qiimo macquul ah.



Hel xog dheeraad ah oo ku saabsan dugsiga baraarinta ee sida buuxda loo dhigto iyo barnaamijyada kahor iyo kadib dugsiga Wasaarada Waxbarashada ontario.ca/page/ministry-education ama findlink.at/full-dayk

BAAHIYAHA GAARKA AH

Barnaamijyada iyo taageerooyinka ayay heli karaan carruurta qaba baahiyaha habdhaqanka, hadalka, garaadka iyo/ama jirka si ay qaab buuxa uga faa'iidaystaan khibradahooda dugsiga.



Xog badan ka ogoow barnaamijyadaan oo aad ka helayso Wasaarada Waxbarashada: ontario.ca/page/ministry-education ama findlink.at/speceduc

WAXBARASHADA KULEEJKA

Ardayda ku dhaqan Ontario ayaa ku qaata waxbarashadooda kuleejka ama tababarada shaqada midkood kuleejyada ama jaamacadaha. Jaamacadaha iyo kuleejyada ayaa sidoo kale baxsha shahaadooyinka dadka wadamada kale wax kusoo bartay ee horey u haystay shahaadooyinka kuleejka/ jaamacada.

KULEEJYADA

Kuleejyada Ontario ayaa baxsha barnaamijyada diirada saaraaya xirfada oo u diyaarsha ardayda helitaanka shaqooyinka xirfadaha kaladuwan ayna ku jirana tignooloojiyada, caafimaadka, ganacsiga, huteellada iyo dalxiiska. Kuleejyada ayaa baxsha barnaamijyada shahaadada iyo diploomada iyo sidoo kale tababarada shaqada (iyo barnaamijyada digriiga qaarkood oo lagu baxsho dhinacyada waxbarashada xirfada gaarka ah).

Caadiyan barnaamijka shahaadada ee kuleej ayaa u baahan waxbarashada hal sano ama kayar. Barnaamijka diploomada kuleejka ayaa badanaa u baahan labo ama saddex sano oo aad waxbarashada si buuxda u wado.

JAAMACADAHA

Ardayda dhigta jaamacadaha ayaa barta barnaamijyada heerka koowaad (shahaadada bajalaarka) iyo barnaamijyada heerarka sare ee jaamacada (mastarka iyo PHD ga). Jaamacadaha ayaa bixiya barnaamijyada farshaxanka iyo sayniska, iyo sidoo kale barnaamijyada xirfadaha gaarka ah sida waxbarashada, caafimaadka, sharciga iyo injineeriyada.

Si guud, jaamacadaha iyo kuleejyada ayaa u baahan in codsadeyaashu ay haystaa diploomada dugsi sare ama shahaado u dhiganta. Hase yeehee, haddii aadan ka qalin jebin dugsi sare, waxaad wali codsan kartaa adoo ah qof wayn haddii aad jirto 19 sano ama ka wayn aadna tahay muwaadin Canada u dhashay ama aad ku timid soo galooti ahaan.

Kalaandarada jaamacada iyo kuleejka ayaa xog ka baxsan barnaamijyadooda iyo shuruudaha gelitaanka. Haddii aad wax ku baratay banaanka Canada, waxaad u baahan tahay in qiimayn lagu sameeyo dukumiintiyadaada waxbarashada. Dugsi kasta wuxuu leeyahay heerarkiisa iyo habraacyadiisa gaarka ah ee qiimaynta. Haddii aad wax ku soo baratay dibada, waxaad u qalmi kartaa sii wadista waxbarashada, in lagaa dhaafto koorsooyinka qaar ama dhibcaha kale oo aad ku helayso waxbarashadaadii hore. La xariir xafiiska diiwaan gelinta dugsiiga si aad u ogaato xog dheeraad ah oo ku saabsan aqoonsiga iyo qiimaynta shahaadada.

CAAWIMAADA DHAQAALAHA

Qarashka waxbarashada ee barnaamijyada waxbarashada kuleejka ayaa kaladuwan asagoo ku xiran barnaamijka aad baranayso. Isha ugu wayn ee caawimaada dhaqaalaha kuleejka ee ardayda waa Barnaamijka Caawimaada Ardayda ee Ontario (OSAP). Dawlada federaalka ayaa sidoo kale bixisa dhaqaale lasoo marsiiyo barnaamijka Daymaha Ardayda ee Canada.

Kuleej iyo jaamacad kasta ayaa leh deeqaheeda iyo kaalmooyinka waxbarashada ee gaarka ah. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo webseedka dugsiiga ama wac xafiiskeeda caawimaada dhaqaalaha.

TABABARADA SHAQADA

Bartaha xirfad waa qof barta xirfad ganacsi oo ku aadan shaqo asagoo tilmaan ka helaaya shaqaalaha khibrada u leh shaqada. Ardayda tababarka shaqada ayaa dhameeya casharka fasalka oo qayb ka ah tababarkooda. Marka aad tahay arday xirfad barta, waxaad tahay shaqaale waxaadna helaysaa mushaar inta aad baranayso farsamada shaqada. In ka badan 150 xirfadaha shaqada ah ayaa lagu baran karaa tababarka shaqada. Arag ilaha xogta ee ku qoran geeska bogga.

QORSHEYAASHA KAYDADKA WAXBARASHADA EE DIIWAAN GASHAN (RESPS)



Waxaad lacag u kaydin kartaa waxbarashada kuleejka ama jaamacada cunugaaga adoo u furaaya koontada aan canshuurta laga qaadi ee RESP oo aad uga furayso bangi, midawga daynta ama shirkada sanduuqa maalgelinta. Xog badan ka ogoow Shaqada iyo Hormarinta Bulshada ee Canada: [hrsdc.gc.ca](https://www.hrsdc.gc.ca) ama findlink.at/can-resp

Kuleejyada iyo Jaamacadaha Ontario

Ka fiiri kuleejyada iyo jaamacadaha Ontario barta ontario.ca ama findlink.at/findschool

Kuleejyada iyo Jaamacadaha ku baxa Luuqada Faransiiska

Ka fiiri kuleejyada iyo jaamacadaha Ontario ee lagu barto Faransiiska barta ontario.ca ama findlink.at/frenschool

Caawimaada Dhaqaalaha ee Ardayda

Ka ogoow haddii aad u qalanto OSAP ontario.ca Xog badan ka ogoow Barnaamijka Daymaha Ardayda ee Canada adoo booqanaaya canada.ca

Barnaamijyada Tababarka Shaqada

Booqo Wasaarada Kuleejyada iyo Jaamacadaha: ontario.ca ama findlink.at/trades



SII WADISTA WAXBARASHADA

Kuleejyada, jaamacadaha iyo goleyaasha dugsiga ayaa baxsha noocyada kaladuwan ee barnaamijyada sii wadista waxbarashada, oo badanaa la baxsho fiidkii iyo maalmaha fasaxa asbuuca

SII WADISTA WAXBARASHADA

Dadka ayaa badanaa qaata koorsooyinka sii wadista waxbarashada kadib marka ay qaataan digriiga ama diploomada si ay u hormariyaan hamigooda sida beer falida ama sawir qaadista, ama si ay uga caawiso gaarista yoolalka ay doonayaan. Tan ayaa khibrad wayn oo waxbarasho u noqon karta waxayna kaa caawin kartaa inaad barato dadka deegaankaaga.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan sii wadista koorsooyinka waxbarashada, booqo webseedyada kuleejyada, jaamacadaha iyo goleyaasha dugsiyada.

Si aad u hesho golaha dugsiga ee deegaankaaga, ka fiiri Bogaga Buluuga ah ee buugaaga taleefannada ama booqo ontario.ca/page/ministry-education ama findlink.at/schoolinfo

Ka fiiri kuleejyada iyo jaamacadaha Ontario Wasaarada Kuleejyada iyo jaamacadaha: ontario.ca/page/ministry-education ama findlink.at/findschool



Koorsooyinka sii wadista waxbarashada ayay heli karaan dadka waawayn ee doonaaya inay kobciyaan xirfadahooda akhriska, wax qorista iyo xisaabaadka. Booqo webseedka Wasaarada Kuleejyada iyo Jaamacadaha si aad u hesho xogta barnaamijyadaan oo aad ka helayso ontario.ca/page/ministry-education ama findlink.at/adultlearn

QAADASHADA SHAAHADADA DUGSI SARE ADOON QOF QAANGAAR AH

Haddii aad ka wayn tahay 18 sano aadna doonayso inaad inaad hesho shahaadada dugsiga sare, tiro barnaamijyada bilaashka ah ayaa la heli karaa.



Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo Wasaarada Waxbarashada oo aad ka Helayso ontario.ca/page/ministry-education ama findlink.at/ossd Xarunta Waxbarashada Madaxa Banaan ayaa bixisa koorsooyinka badan ee dugsiga sare oo lagu baran karo oonlaynka. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo ilc.org



TABABARKA LUUQADA

Barashada Ingiriisiga ama Faransiiska ayaa qayb muhiim ah u ah dagista Canada. Aqoonta midkood ama labadaba luuqadaha rasmiga ah ee Canada ayaa kuu faa'iideynaaya dhammaan dhinacyada nolosha.

CASHARADA LUUQADA

Dawladaha federaalka iyo gobalka ayaa maalgelin siiya goleyaasha dugsiga, wakaaladaha kuleejyada iyo jaamacadaha si ay u bixiyaan casharada Ingiriisiga iyo Faransiiska oo bilaash ah.

Kuleejyada, jaamacadaha iyo dugsiyada luuqada ee gaarka loo leeyahay ayaa sidoo kale bixiya koorsooyinka luuqada oo bilaash ah.

Waxaa jira dhawr nooc oo casharada Ingiriisiga iyo Faransiiska ah oo laga heli karo Ontario, ayna ku jiraan:

- English Literacy Development (ELD)
- English and French as a Second Language (ESL and FSL)
- Language Instruction for Newcomers to Canada (LINC)
- Cours de langue pour les immigrants au Canada (CLIC)
- Occupation-specific Language Training (OSLT)
- Enhanced Language Training (ELT)
- Specialized Language Training (SLT)

QIIMEYNTA LUUQADA



Kahor intaadan iska qorin barnaamij luuqadeed, waxaad u baahan kartaa in la qiimeeyo xirfadaada luuqada. Waydii la taliyahaaga dejinta inuu kugu hago xarunta qiimaynta ee deegaankaaga ama booqo cic.gc.ca/english/newcomers/services

Qaar kamid ah gobollada Ontario, waxaad dooran kartaa in la qiimeeyo midkood xirfadahaaga Ingiriisiga ama Faransiiska.

Qiimaynta Luuqada

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan qiimaynta luuqada, booqo www.language.ca ama findlink.at/clb-assess

Hel Casharada Luuqada

Si aad u hesho casharka luuqada ee deegaankaaga, booqo Waaxda Soo Galootiga ee Ontario oo aad ka helayso ontarioimmigration.ca ama findlink.at/onlinetool. Waxaad sidoo kale wici kartaa ama booqan kartaa 21ontario.ca

Dadka ku Cusub Canada

Si aad xog uga ogaato tababarka LINC ee aad guriga ku samayn karo, booqo tcet.com ama findlink.at/homestudy

Tababarka Luuqada ee gaarka u ah Shaqada

OSLT ayaa bixisa casharo bilaash ah oo lagu bixiyo kuleejyada ku saabsan xirfadaha hadalka ee shaqooyinka gaarka ah. Xog badan ka ogoow barta co-oslt.org



QORSHAHA DEJINTA

Si aad u hesho nuqulka faahfaahsan ee qorshaha dejinta, fadlan booqo <http://my.orientationontario.ca/content/settlement-planning-tools>

DARYEELKA ILMAHA

Qorshayso daryeelka ilmaha

1. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

2. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

3. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

WAXBARARASHADA DUGSIGA HOOSE-DHEXE IYO SARE

- Baro dugsiyada carruurtaadu dhigan doonaan
- Baro waqtiga loo cayimay ka diiwaan gelinta carruurtaada dugsiya
- Soo diyaarso dhammaan dukumiintiyada lagaa rabo si aad carruurtaada uga diiwaan geliso dugsiya:

U diyaarso gaadiidkii carruurtaada gayn lahaa kana keeni lahaa dugsiya

- Cadaynta da'da
- Cadaynta ciwaanka
- Cadaynta waalidnimada
- Diiwaannada talaalka

1. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

2. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

3. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

WAXBARASHADA KULEEJKA

- Baro waqtiyada loo yimay codsiga kuleejka iyo jaamacada ee naftaada ama carruurtaada
- Baro shuruudaha guud ee diiwaan gelinta.
- Codso taageerada maalgelin kasta oo la heli karo.

1. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

2. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

3. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

SII WADISTA WAXBARASHADA

- Xog ka ogoow gudiga kuleejka, jaamacada ama dugsiga ee koorsooyinka sii wadista waxbarashada ee la xariira hamigaaga ama shaqadaada.

1. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

2. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

3. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

TABABARKA LUUQADA

Mar qiimaynta xirfadaada luuqada.

La hadal la taliye si aad xog uga hesho tababarka luuqada ee gaarka ah u ah shaqadaada.

Aqoonso barnaamijka luuqada oo ugu habboon baahiyahaaga.

1. Shaqada

Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

2. Shaqada

Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

3. Shaqada

Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

SHAQADA IYO GANACSIGA

Qaytaan ayaa bixinaysa xog kaa caawinaysa fahanka iyo helitaanka suuqa shaqaalaha ee Ontario. Waxaad xog ka baran doontaa u diyaar garoowga ka shaqaynta Ontario, helista aqoonsiga tababarkaaga iyo khibradaada shaqo ee wadamada kale, raadinta shaqo si sax ah iyo bilaabista ganacsi kuu gaar ah.

40

U Diyaar Garoowga
Shaqada

42

Raadinta Shaqada

44

Xaquuqaha
Goobta Shaqada

46

Bilaabida
Ganacsigaaga

47

Qorshaha Dejinta





U DIYAAR GAROOWGA SHQADA

Codsashada SIN kaaga

Si aad u ogaato sida loo codsado SIN kaaga, booqo Service Canada oo aad ka helaysi servicecanada.gc.ca ama findlink.at/sin

Qiimaynta Shahaadada

Booqo Xarunta Xogta ee Canada ee Shahaadooyinka Caalamiga ah adoo booqanaaya cicic.ca ama findlink.at/cicic-cred ama Xafiiska Tixraaca Shahaadooyinka Shisheeye ee canada.ca

Khibrada Caalamiga ah ee Ontario

Si aad u hesho xog ku aadan shaqooyinka shuruudaha leh ee ka jira Ontario, wac [1-866-670-4094](tel:1-866-670-4094) ama booqo ontario.ca ama findlink.at/globalxpe

HealthForce Ontario

Haddii aad tahay qof soo bartay cilmiga caafimaadka, wac [1-800-596-4046](tel:1-800-596-4046) ama booqo healthforceontario.ca

Barkaaniyada Kaabista

Si aad u hesho xog ku saabsan barnaamijyada kaabista, la hadal la taliyahaaga dejinta ama booqo ontario.ca ama findlink.at/training

LAMBARKA CAYMISKA BULSHADA (SIN)

Kahor intaadan awoodin inaad ka shaqayso Canada, waa qasab inaad lahaato Lambarka Caymiska Bulshada (oo badanaa la yiraahdo SIN). Marka aad shaqo hesho, shirkada aad u shaqayso ayaa ku waydiin doonta kaarkaaga SIN si loo dhamaystiro hanaanka shaqaalaysiinta. Waxaad sidoo kale adeegsan doontaa lambarkaan si aad u buuxiso foomamka canshuurta aadna u codsato qaar kamid ah adeegyada dawlada. Waa inaad qarsataa lambarkaaga SIN aadna ilaalsataa.

QIIMEYNTA SHAHAADOOYINKA WAXBARASHADA DIBADA

Waa muhiim inaad hesho marka hore haddii aad u baahan tahay in shahaadooyinkaaga waxbarashada shisheeye la qiimeeyo. Qaar kamid ah shaqooyinka la maamulo ama aan la maamulin, muhiim maaha, waana arrin caadiyan ku xiran doonista loo shaqeeyaha.

Haddii aad u baahan tahay qiimayn sabab la xariirta in shaqadaadu shuruud waxbarasho oo gaar ah leedahay, markaas shahaadooyinkaaga ayaa lagu qiimayn doonaa waxbarashada u dhiganta ee Canada. Tani waxay kuu sahlaysaa inaad ogaato haddii aad u baahan tahay tababar ama waxbarasho dheeraad ah si aad u hesho shaqada aad doonayso gudaha Ontario. Arag ilaha xogta ee ku qoran geeska bogga.

SHAQOYINKA KA JIRA ONTARIO

Waxaa jira dookhyo badan oo shaqooyinka, xirfadaha iyo ganacsiyada ah oo ka shaqeeya Ontario. Qaar kamid ah adeegyadaan ayaa la maamulaa halka kuwo kale yihiin kuwo aan sharcigu maamulin ama iskood isku maamula.

SHAQOYINKA LA MAAMULO AMA KUWA AAN LA MAAMULIN

Inta badan xirfadaha iyo ganacsiyo badan ayaan kaa doonayn inaad haysato ruqsad ama shahaado gaar ah si aad uga shaqayso Ontario. Kuwaan waxaa loo yaqaanaa shaqooyinka aan shuruudaha lahayn. Shaqooyinka aan shuruudaha lagu xirin waxaa ku jira maamuleyaasha dhaqaalaha, dhaqaale-yahannada, xirfadleeyda kumbuyuutada, diiwaan hayeyaasha, qiimaynada nidaamyada, xirfadleeyda alwaaxa, cunto kariyaasha iyo kuwo kale.

Waxaa jira shaqooyinka qaar shahaado aan loo baahnayn si aad uga shaqayso Ontario, laakiin la heli karo. Kuwaan waxaa loo yaqaanaa shaqooyinka iskood isku maamula. Tusaale ayaa ah la taliyaha arimaha shaqaalaha.

SHAQOYINKA SHURUUDAHA LEH

Xirfado iyo ganacsiyo badan oo ka shaqeeya Ontario, ayna ku jiraan shaqada bulshada, kalkaalinta, ganacsiyada korontada iyo tuubooyinka, ayaa u baahan inaad diiwaan gashan tahay, ama ruqsad ka haysato, wakaalad sharci ah. Kuwaan waxaa loo yaqaanaa shaqooyinka la maamulo. Haddii aad doonayso inaad ka shaqayso shaqo shahaado u baahan, waxaad u baahan doontaa inaad raadiso haayada sharciga shaqada ee Ontario si aad u ogaato waxa lagaa rabo si aad u hesho ruqsad ama diiwaan gelin.

Laanta Khibradaha Caalamiga ah ee Ontario (GEO) ayaa ah xarun adeeg oo laga helo xog iyo caawimaad bilaash ah oo ay helayaan dadka wadanka ku cusub ee xirfadaha leh ee doonaya inay ka shaqeeyaan shaqooyinka ka baxsan caafimaadka iyo ganacsiyada xirfada leh. Shaqooyinka caafimaadka, HealthForceOntario ayaa ah wakaalada ugu wayn ee xirfadleyaasha caafimaadka ee wadamada shisheeye wax kusoo bartay.

BARNAAMIYADA KAABISTA WAXBARASHADA

Barnaamijyada tababarka aqoon kaabista ah ee Ontario ayaa kaa caawinaaya inaad u diyaar garoowdo inaad ka shaqayso xirfadaada ayagoo ku siinaaya tababar, kordhinta xirfadaha, caawimaada raadinta shaqada xirfad gaar ah iyo taageerooyinka shaqada. Qaar kamid ah barnaamijyada tababarka aqoon kaabista ah ayaa kuu diyaarinaaya inaad hesho ruqsad aad uga shaqayso xirfad aqoonsi leh. Barnaamijyo kale ayaa ku siinaaya helitaanka fursado la xariira xirfadaada oo ka jira Ontario oo aad ku helayso boosaska shaqada, tababaro hagsis ah kuguna xiraaya loo shaqeeyaahsa. Ka fiiri ilaha xogta bogga bogga kale.

WAXYAABAHA AAD KA FAKARAYSO

Shaqada aad doonaayo ma mid aqoonsi u baahan baa mise uma baahna?

Hadday aqoonsi u baahan tahay, maxaan u baahan nahay inaan sameeyo si aan u helo ruqsada?

Miyaan haystaa dhammaan dukumiintiyada aan u baahan nahay si loo qiimeeyo shahaadooyinkayga? Qofkee ayaan la xariirayaa si aan u helo dukumiintiyada maqan?

Shaqadaydu ma u baahan tahay cadaynta heerka waxbarashada gaarka ah? Miyay u baahan tahay inaan barto mihnad gaar ah?

Miyaan haystaa shahaadooyinka waxbarashada ee la iga raco?



RAADINTA SHAQO

Raadinta shaqada aad doonayso ayaa qaadanaaya waqti iyo qorshayn. Shaqo ka raadinta Ontario ayaa kugu keeni karta caqabado cusub. Siifiiga ayaa loosoo gudbin karaa qaab kale, xariirada shaqada ayaana badanaa qayb muhiim ah ka ciyaara raadinta shaqadaada. Wakaaladaha kaladuwan iyo taageerooyinka ayaa la heli karaa si ay kuu caawiyaan.

TAAGEEROOYINKA RAADINTA SHAQADA

Waxaa jira barnaamijyo iyo webseedyo badan oo ka caawiya dadka wadanka ku cusub barashada suuqa shaqaalaha iyo shaqo ka helida Ontario. Waxaad ku bilaabi kartaa cilmi baaristaada wax kamid ah waxyaabaha soo socda:



Xog badan ka ogoow suuqa shaqaalaha ee Ontario oo laga heli karo ontario.ca ama findlink.at/lmi



Wac Xarunta Xariirka Shaqada ee Ontario si aad u hesho xog iyo tilmaamo kaa caawinaaya raadinta shaqo adoo ka wacaaya [1-800-387-5656](tel:1-800-387-5656) ama booqo Laanta Shaqada ee Ontario ontario.ca ama findlink.at/etlanding

Baro sida adeeg bixiyaha Laanta Shaqada ee Ontario kuu caawin karo adoo booqanaaya findlink.at/ineedajob

Baro "Working in Canada," (Ka shaqaynta Canada), aalad ay abuurtay Dawlada Canada: workingincanada.gc.ca



Akhri maqaallada shaqo raadinta ee muhiimka ah oo aad ka helayso settlement.org ama findlink.at/employInfo

Gal kaydka xogta ee Service Canada si aad u aragto shaqooyinka ka banaan dhammaan Ontario iyo Canada oo aad oonlaynka uga helayso jobbank.gc.ca

ISKU XIRKA SHAQAALAHA



Mutadawicida ayaa noqon karta qaab wanaagsan oo aad xiriir ula yeelato shaqaalaha Canada. Wac 211 oo waydii goobta xarunta mutadawacnimada ee deegaankaaga, ama booqo Shabakada Xarunta Mutadawacnimada ee Ontario oo aad ka helayso ovcn.ca



Career Edge ayaa siisa tababarada shaqada dadka soo galootiga ah oo lagu baraayo shaqooyinka kaladuwan ee ana shahaadada u baahnaayn, ayna ku jiraan maamulka ganacsiga, kimistariga, isgaarsiinta, daraasaadka bii'ada iyo dhaqaalaha. Si aad u hesho xog dheeraad ah aadna u codsato, wac [1-888-507-3343](tel:1-888-507-3343) ama booqo careeredge.ca

WAXYAABAHA AAD KA FAKARAYSO

Miyaan u baahan nahay tababar dheeri ah oo ku aadan xirfadaha hadalka ee gaarka u ah shaqada si aan guul uga gaaro shaqadayda?

Xagee ayaan ka helayaa fikradaha khabaradaha ee ku aadan sifiigayga iyo waraaqaha codsiga iyo taageerada kale ee shaqo raadinta?

Xagee ayaan aadi karaa si aan ula kulmo dadka ka shaqeeya xirfadayda?

Waa maxay heerka caadiga ah ee mushaarka shaqada aan doonaayo gudaha Ontario?

Waa maxay isbadellada muhiimka ah ee dhawaan ku dhacay shaqada iyo ganacsiga aan rabo inaan ka shaqeeyo gudaha Ontario?



CODSASHADA SHAQO



Waxaad caadiyan codsataa shaqo adoo diraaya siifiigaaga (oo sidoo kale loo yaqaano "liiska xirfadaha aqoonta" ama CV) iyo waraaqda codsiga. Siifiigu liiska xirfadahaaga iyo khibrada shaqada. Waraaqda codsigu waa qeexitaanka kooban ee waxa kaa dhigaaya musharaxa u qalma shaqada

Loo shaqeeyaasha qaarkood ayaan ka warqabi doonin muhiimada khibradaada hore ee aad ku lahayd wadan kale. Xaqiiji in siifiigaaga iyo waraaqda codsigu ay muujiyaan sida khibrada shaqadaadii hore ay u anfacyso loo shaqeeyaha reer Ontario. Waxaad ka helayaa xog ku saabsan abuurista siifiiga iyo waraaqda codsiga, iyo sidoo kale u diyaar garoowga wareysiyada shaqada, barta

workingincanada.gc.ca iyo jobsetc.gc.ca

 Welcome to Canada

DHAQANKA GOOBTA SHAQADA EE ONTARIO


Dhaqanka goobta shaqada ayaa kala duwan wadamada kaladuwan, iyo xataa shaqooyinka kaladuwan. Si guud, loo shaqeeyaasha Ontario ayaa muhiimad wayn saara xirfadaha xariirka. Wakaaladaha dejinta ee deegaankaaga iyo khibrada kale ee shaqada ayaa kaa caawin kara inaad wax ka barato dhaqanka goobta shaqada ee Ontario. Qaar kamid ah koorsooyinka tababarka luuqada ayaaa lagu daraa tababarka dhaqanka iyo xariirka goobta shaqada.





XUQUUQAHA GOOBTA SHAQADA


SINAANTA GOOBTA SHAQADA

 Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Ontario ayaa mamnuucaaya takoor ka dhaca goobta shaqada. Ma jiro qof ka shaqaynaaya ama codsanaaya shaqo gudaha Ontario oo loola dhaqmi karo si cadaalad daro ah ama loo dhibaataayn karo sabab la xariirta isirkiisa, asalkiisa, meesha uu kasoo jeedo, midabkiisa, muwaadinimada, diinta, da'da, jinsiga, dookha galmada, diiwaanka danbiyada, xaalada guurka, qaniisnimada, xaalada qoyska ama naafada. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan xaquuqdaada sinaanta iyo waajibadaadka goobta shaqada, booqo barta Gudiga Xuquuqda Aadanaha ee Ontario oo ah ohrc.on.ca ama findlink.at/ohrcemploy

SHARCIGA HEERARKA SHAQADA EE ONTARIO

Shaqaalaha ka shaqeeya Ontario ayaa xaq u leh goob shaqo oo cadaalad yo amaan leh. Sharciga Heerarka Shaqada ee Ontario (ESA) ayaa dejinaysa heerarka ugu yar ee loo shaqeeyaasha iyo shaqaalaha ay tahay inay raacaan.

MUSHAARAADKA

 Inta badan shaqaalaha reer Ontario ayaa xaq u leh in la siiyo mushaarka heerka ugu hooseeya ee sharciga ah. Sanadka 2025 mushaarka ugu yar ee guud ayaa u dhexeeya \$17.20 saacadiiba halka mushaarka ugu yar ee ardayda uu u dhexeeyo \$16.20 saacadiiba.⁵ Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, booqo webseedka Wasaarada Shaqaalaha, Tababarka iyo Hormarinta Xirfadaha oo ah ontario.ca ama findlink.at/minwage

SAACADAHA SHAQADA

Si guud, shaqaalaha ayaan lagu qasbi karin inay shaqeeyaan wax ka badan sideed saacadood maalintii iyo wadarta guud oo ah 48 saacadood asbuucii, marka lagasoo tago xaalado gaar ah. Saacadaha ugu badan ayaa lagu kordhin karaa heshiis qoraal ah iyo marka uu ogolaado Agaasimaha Ontario ee Heerarka Shaqada.

FASAXYADAHA DADWAYNAHA

Waxaa jira sagaal fasaxyada dadwaynaha oo ka jira sanad kasta gudaha Ontario. Shaqaalaha u qalma ayaa xaq u leh inay shaqada ka maqnaadaan maalmahaan fasaxa iyo in la siiyo mushaarka maalinta fasaxa. Fasaxyada dadwaynaha ee Ontario waa: Maalinta Sanadka Cusub, Maalinta Qoyska, Jimcada Wanaagsan, Maalinta Victoria, Maalinta Canada, Maalinta Shaqaalaha, Maalinta Mahadnaqa, Maalinta Ciida Kirismaska iyo Maalinta Feerka.

WAQTIGA FASAXA


Si guud, shaqaalaha ayaa xaq u leh muddo fasax oo dhan labo asbuuc ugu yaraan 12 bilood oo shaqaba mar. Si waafaqsan waqtiga fasaxa mushaarka lagu qaato, shaqaalaha ayaa xaq u leh in la siiyo ugu yaraan afar boqolkiiba mushaarkooda guud.

⁵ This rate applies to students under the age of 18 who work 28 hours per week or less when school is in session or work during a school break or summer holidays.

QAADASHADA MUSHARKAAGA

Shaqaalaha waa in mushaarka la siiyaa maalinta mushaarka oo joogto ah, oo meerto ah lana siiyaa bayaanka muujinaaya mushaaraadkooda iyo lacagaha laga jaray mudadaas mushaarka.

FASAXA HOOYADA IYO WAALIDKA


 Hooyooyinka iyo aabeyaasha shaqeeya ayaa xaq u leh fasaxa ku meel gaarka ah ee bilaa mushaarka ah oo ay ka qaataan shaqadooda marka ay ilmo dhalayaan ama uu ilmo u dhashay markaas. Caymiska Shaqada (EI) ayaa gunnooyin siinaaya waalidiinta u qalma.

Si aad xog badan uga ogaato xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga ku cad Sharciga Heerarka Shaqada, wac Xarunta Xogta Heerarka Shaqada ee Wasaarada Shaqaalaha oo aad ka helayso **1-800-531-5551** (xogta ayaa lagu bixinayaa 23 luquadood) ama booqo webseedka Wasaarada Shaqaalaha, Tababarka iyo Hormarinta Xirfadaha oo ah ontario.ca ama findlink.at/on-esa

Waxaad sidoo kale booqan kartaa xarunta Service Canada si aad ula hadasho madaxa arrimaha shaqaalaha ee dawlada federaalka ah. Akhri Bogaga Buluuga ah ee buugaaga taleefanka ama booqo servicecanada.gc.ca si aad u hesho goobaha.

CAAFIMAADKA IYO BADQABKA

Sharciga Caafimaadka iyo Badqabka Shaqada ee Ontario ayaa dejinaaya heerar difaacaya caafimaadka iyo badqabka shaqaalaha Ontario. Wuxuu qabanayaa dhammaan goobaha shaqada ee dhammaan ganacsiyada ka jira Ontario, ayadoo ay jirana shardi dhaafyada qaar.

 Akhri xog ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka adiga iyo cida aad u shaqayso ee shaqada ee la xariira caafimaadka iyo badqabka oo aad ka helayso buug hawleedka Wacyi gelinta **Caafimaadka iyo Badqabka Shaqaalaha oo 4 Talaabo** ah.


Buuga shaqada ayaa laga heli karaa webseedka Wasaarada Shaqaalaha, Tababarka iyo Hormarinta Xirfadaha oo ah ontario.ca ama findlink.at/hsawarenes waxaad sidoo kale ka wici kartaa ServiceOntario lambarka **1-800-267-8097** si aad u waydiiso buug hawleedka oo laguugu soo dirayo boostada.

Si aad xog badan uga ogaato istaraatiijiyada Wasaarada Shaqaalaha si loo difaaco shaqaalaha, booqo ontario.ca ama findlink.at/hsafety

Si aad u barato sida loosoo sheego cilad dhanka amaan ah oo shaqada ka jirta, wac Xarunta Xariirka Caafimaadka iyo Badqabka oo aad ka wacayso **1-877-202-0008**.

GUDIGA BADQABKA IYO CAYMISTA GOOBTA SHAQADA EE ONTARIO

Gudiga Badqabka iyo Caymiska Goobta Shaqada ee Ontario (WSIB) ayaa maamula caymiska goobta shaqada ee bilaa khaladka ah ee Ontario lana siiyo loo shaqeeyaasha iyo shaqaalaha. Gudiga waxaa lagu maalgashaa qoondooyinka loo shaqeeyaasha. Wuxuu bixiyaa gunnooyinka naafada, wuxuu kormeeraa tayada daryeelka caafimaadka ee shaqaaluhu helaan wuxuuna caawiyaa shaqaalaha ku dhawaacma shaqada.

 Haddii dhaawac kaasoo gaaray shaqada ama aad doonayso inaad xog badan ka ogaato caymiska iyo badqabka goobta shaqada, wac **1-800-387-0750** ama booqo WSIB oo ah wsib.on.ca





BILAABIDA GANACSIGAAGA

Kuwaani waa fursado cajiib ah oo la xariira ka furista ganacsi kuu gaar ah Ontario. Sanadkii 2012, in ka badan 2.9 milyan o qof ayaa ka shaqo bilaabay ganacsiyada yaryar iyo kuwa heerka dhexe ee ku yaala Ontario. Ganacsiyadaan ayaa u dhigma 98 boqolkiiba ganacsiyada ku yaala Ontario.⁶



Si aad xog badan uga ogaato ka bilaabista ganacsi Ontario, booqo webseedka Wasaarada Horumarinta Shaqaalaha, Shaqo Abuurka iyo Ganacsiga oo ah ontario.ca ama findlink.at/business

Dawlada Ontario ayaa abuurtay xarumaha ganacsiyada yaryar, oo ku taala gobalka oo dhan. Halkaan, waxaad ka helayso xogta iyo adeegyada la xariira bilaabida, mulkiyada iyo maamulida ganacsi yar oo guulaysta. Xog badan ka ogoow adoo wacaaya [1-800-567-2345](tel:1-800-567-2345) ama booqanaaya ontario.ca ama findlink.at/sbec

Dawlada Canada ayaa abuurtay tiro Adeegyada Ganacsiyada Yaryar ah (SBS) halkaas oo aad ka helayso xog iyo taageero kaa caawinaysa inaad biloowdo ganacsigaaga. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo sbs-spe.feddevontario.canada.ca/en

⁶Xigasho: Ministry of Economic Development, Job Creation and Trade: ontario.ca ama findlink.at/onmedte

QORSHAHA DEJINTA

Si aad u hesho nuqulka faahfaahsan ee qorshaha dejinta, fadlan booqo <http://my.orientationontario.ca/content/settlement-planning-tools>

U DIYAAR GAROOWGA SHQADA

- | | |
|--|---|
| <input type="checkbox"/> Codso Lambarkaaga Caymiska Bulshada (SIN). | <input type="checkbox"/> Qiimayn u gudbi shahaadooyinkaaga waxbarashada |
| <input type="checkbox"/> Ogoow in shaqadaadu tahay mid aqoonsi oga baahan gudaha Ontario | <input type="checkbox"/> Hel barnaamijyada aqoon kabista ah ee ka jira deegaankaaga ee la xariira yoolalkaaga xirfada |

1. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

2. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

3. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

RAADINTA SHAQO

- | | |
|---|---|
| <input type="checkbox"/> Kala hadal la taliyahaaga dejinta ama la taliyaha shaqada baahiyahaaga shaqo raadinta iyo talaabooyinka. | <input type="checkbox"/> Diyaarso siifii iyo waraaqda codsiga ee xariirada maxaliga ah. |
| <input type="checkbox"/> Hel fahan aasaasi ah oo ku aadan dhaqanka goobta shaqada ee Ontario ee shaqada aad doonayso | <input type="checkbox"/> Biloww inaad iskuxir wanaagsan samayso aadna samayso liiska xariirada maxaliga ah |
| | <input type="checkbox"/> Hel shaqooyin kasta oo mutadawacnimo ah oo la heli karo waafaqsana khibradaada oo ku siin kara khibrado oo dheeri ah |

1. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

2. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

3. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

BILAABIDA GANACSIGAAGA

- La xariir xarunta ganacsiyada yaryar si aad u hesho xog ku saabsan bilaabista ganacsigaaga gaarkaah.

1. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

2. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

3. Shaqada _____ Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta _____

LACAGTA IYO DHAQA- ALAHA GAARKA AH

Qaybtaan ayaa ka hadlaysa arrimaha muhiimka ah ee la xariira lacagtaada. Waxaad heli doontaa xog ku saabsan furashada koontada banka, helitaanka daynta iyo dhiibista canshuuraha, iyo sidoo kale xog ku saabsan gunnooyinka iyo caawimaada bulshada.

50

Lacagta iyo
Bangiyada

51

Qaadashada
Daynta

52

Canshuuraha

53

Gunnooyinka iyo
Caawimaad Bulshada

54

Qorshaha Dejinta



LACAGTA IYO BANGIGA

Dadka reer Ontario ayaa caadiyan lacagtooda gashta bangida, midawiyada daynta ama shirkadaha kaydka. Xarumahaan dhaqaalaha ayaa ah kuwo amaan ah oo lagu qanco. Inta badan xarumaha dhaqaalaha ayaa xubin ka ah Iskaashatada Caymiska Damaannada ee Canada, taasoo ka dhigan in dawladu damaanad qaadayso lacagta ku jirta koontadaada ee dhan ugu badnaan \$100,000.

LACAGTA


Si aad u hesho xog ku saabsan lacagta Canada iyo sarifka lacagaha qalaad iyo lacagta Canada, akhri Ku soo Dhawoow Canada. Marna lacag kaash ah haku dirin boostada. Badelka taas, adeegso jeeg, dalabka lacagta (oo lagasoo iibsado bangi), dalabka boostada (lagasoo iibsado xafiiska boostada) ama lacag dirista oonlaynka ah. Bangida iyo adeegyada lacag dirista gaarka loo leeyahay ayaa ku siin kara dookhyo kale oo aad lacagta ku dirto.

 Welcome to Canada

ADEEGYADA BANGIGA

Waxaad furan kartaa koonto bangi xataa haddii aadan haysan shaqo ama aadan haysan wax lacag ah oo aad ku shubto koontada markaas. Inta badan bangida ayaa bixiya adeegyada soo socda:

- Koontooyinka jeega iyo kaydka
- Kaararka kaashka bangiga
- Adeegga bangiga ee interneedka iyo taleefaka ee 24 saac shaqeeya
- Kaararka daynta iyo amaahda
- Agabka maalgashiga iyo qorshaynta
- Talo dhaqaale

 Inkastoo bangida Canada loo arko kuwo amaankoodu aad u adag yahay, waxaad u baahan tahay inaad xog buuxda haysato si aad u difaacdo masaalixdaada dhaqaalaha. Si aad u hesho tilmaamo iyo xog ku saabsan sida aad naftaada iyo dhaqaalahaaga uga difaaci karto falalka khiyaannada ah sida khiyaannada kaarka bangiga, codso oo akhri Buug-gacmeedka Macmiilka ee Canada oo aad ka helayso consumerhandbook.ca

 Welcome to Canada

FURASHADA KOONTO

Waa fikir wanaagsan inaad raadiso xarumaha dhaqaalaha ee kaladuwan kahor intaadan furan koontada.

Qarashka agabka iyo adeegyada bangiga iyo sidoo kale qiimaha dulsaaraha ayaa kaladuwanaan kara. Xog ka ogoow koontooyinka bangiga ee aan qaadin qarashka, kuwaasoo aad u soo badanaaya. Sidoo kale, xog ka ogoow adeegyada gaarka u ah dadka wadanka ku cusub.

Waxaad u baahan doontaa koontada jeega haddii loo shaqeeyahaagu adeegsado lacag shubista tooska ah ee mushaarka. Koontooyinka kaydada iyo maalgashiga ayaa muhiim u ah kaydinta lacag sabab la xariirta inay leeyihiin heerarka sareeya ee dulsaarta oo ka badan tan koontooyinka jeegaga.

Hase yeeshee, waxaa lagu ogolaan karaa inaad dirto cadad gaar ah oo cayiman oo lacag ah. Inta badan macaamiisha furta koontooyinka kaydka ayaa sidoo kale leh koontooyinka jeega si ay ugu adeegsadaan hawlaha bangigaga ee maalinlaha ah.

Si aad u farato koonto bangi, midaw daymeed ama shirkad kayd, waxaad u baahan doontaa inaad keento labo cadaymood oo aqoonsi, sida baasaboora iyo Lambarka Caymiska Bulshada (SIN). Caadiyan, hal aqoonsi waa inuu lahaadaa sawirkaaga.

Marka aad furato koonto bangi, waxaad heli doontaa kaarka baanka (oo sidoo kale loo yaqaano kaarka debit ka). Waxaad kaarka u adeegsan kartaa badelka kaashka inta badan dukaannada, maqaayadaha iyo ganacsiyada kale. Kaarka ayaa sidoo kuu sahlaysa inaad lacagaha kala baxda kugu shubto mashiinnada bangiga (oo loo yaqaano Mashiinnada Lacag La bixida Otomaatiga ah ama ATMs).

 Welcome to Canada

WAXYAABAHA AAD KA FAKARAYSO

Waa kuwee bangida leh adeegyada qaarka u ah dadka wadanka ku cusub?

Miyaan u baahan nahay koontada kaydka iyo koontada jeega?

Haddii aan haysto kaarka debit ee hal bangi aana adeegsado ATM ka bangi kale, waa maxay qarashka adeeggu?

QAADASHADA DAYN

DAYN

Dayn waxaa laga wadaa soo amaahashada lacag. Kaararka daynta iyo daymanka bangiga ayaa badanaa ah noocyada ugu badan ee daynta. Caadiyan dadka daynta qaata ayaa dib u bixiya daynta ayadoo qaybo yaryar oo joogto ah. Cadadka iyo inta jeer ee lacagta la bixinaayo waa in la cadeeyaa waqtiga daynta ama amaahda la bixinaayo.

Marka aad hesho amaahda bangiga ama kaarka daynta, waxaad bixinaysaa dulsaar. Dulsaartu waa lacag uu dayn bixiyuhu (oo badanaa ah bangi) uu dulsaaro dayn qaataha.


Qiimaha dulsaarta ayaa loola jeedaa cadadka boqolkiiba wadarta guud ee lacagta la daynsaday ee aad hadhoow bixinaysa ayadoo dheeraad ku ah daynta xili loo cayimay. Daymaha qaar iyo kaararka amaahda ayaa leh dulsaar aad u badan. Sidaas awgeed, mar kasta oo aad laca ka daynsato bangi ayadoo ah qaabka daynta bangiga ama kaarka amaahda, waa inaad waydiisaa heerka qiimaha dulsaarta.

Akhri Kusoo Dhawoow Canada si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan noocyada kaladuwan ee daynta iyo amaahda iyo sida aad ku xulanayso kuna codsanayso kaarka amaahda.


 Welcome to Canada

ABUURISTA TAARIIKHDA DAYNTA

Markasta oo aad qaadato amaah ama aad adeegsato kaarka daynta, wakaalada warbixinta ayaa aruurinaysa xog ku saabsan inaad lacagta ku bixisay waqtigeedii iyo mudada ay kugu qaadatay inaad soo celiso lacagta daynta ee aad amaahatay. Xogtaan ayaa qayb ka noqonaysa taariikhdaada amaahda.

 **Waa muhiim inaad dhisato taariikhda wanaagsan ee daynta gudaha Ontario. Haddii aad doonayso inaad codsato kaarka daynta, amaah ama daynta guriga, xaruntaada dhaqaalaha ayaa qiimayn doonta taariikhdaada daynta si aad u ogaato sida aad u maaraysay hawlahaaga dhaqaalaha ee hore. Ayadoo lagu salaynaayo taariikhdaada amaahda, xaruntaada dhaqaalaha ayaa go'aamin doonta inay ku siiso daynta aad doonayso iyo inkale.**

Dad badan ayaa bilaaba inay ku dhisaan taariikhdooda daynta kaararka amaahda. La hadal wakiil ka socda xaruntaada dhaqaalaha si aad wax uga waydiiso barnaamijyada kaarka daynta ee dadka wadanka ku cusub. Kahor intaadan saxiixin heshiis, akhri dhammaan shuruudaha iyo xeerarka.

 Wakaalada Dhaqaalaha ee Macaamiisha Canada ayaaad ka helayaa tilmaamo iyo xog muhiim ah oo ku saabsan amaahda oo aad ka helayso fcac-acfc.gc.ca



WAXYAABAHA AAD KA FAKARAYSO

Waa maxay heerka dulsaarta ee kaarkayga daynta?

Sidee ayaan ku ogaanayaa heerkayga hadda ee daynta?

Maxaan samayn karaa si aan u dhiso taariikhdayda daynta?





CANSHUURAHHA

Gudaha Canada, canshuuro ayay aruuriyaan dhammaan saddexda heer dawlada: federaalka, gobalka iyo dawlada hoose. Canshuuraha ayaa taageera barnaamijyada dalwadu maalgeliso sida waxbarashada, caafimaadka, gaabeayaasha gaadiidka iyo tababarka xirfadaha.

WAXYAABAHA AAD KA FAKARAYSO

Yaan waydiin karaa su'aalo ku saabsan canshuurahayga?

Xagee ayaan ka helayaa caawimaad ku aadan buuxinta canshuur celintayda?

Miyaan u qalmaa Gunnada Canshuurta ee Ilmaha ee Canada?

NOOCYADA CANSHUURAHHA

Noocyada ugu badan ee canshuuraha la qaado waa canshuurta dakhliga, canshuurta iibka, canshuurta guryaha iyo canshuurta ganacsiga.

Xaqiiji inaad taqaano risiidyada iyo dukumiintiyada kale ee lagaa rabo inaad uruuriso dhammaan sanadka si ugu adeegsato arimaha canshuurta la xariira.



Qeexitaanka noocyada kaladuwan ee canshuuraha, booqo Wasaarada Dhaqaalaha oo aad ka helayso fin.gov.on.ca ama findlink.at/finance

CANSHUURTA DAKHLIGA

Dadka reer Canada ayaa buuxiya canshuur celintooda dakhliga sanad kasta marka la gaaro Abriil 30. Waa inaad soo sheegtaa dhammaan dakhliga kaasoo galay meel kasta, xataa haddii aad ka heshay dibada wadanka.



Waxaad heli kartaa caawimaad bilaash ah oo la xariirta buuxinta celinta canshuurtaada dakhliga oo aad ka helayso Barnaamijka Canshuurta Dakhliga ee Mutadawiciinta Bulshada. Booqo Wakaalada Dakhliga ee Canada (CRA) oo aad ka helayso cra-arc.gc.ca ama findlink.at/incometax

CANSHUURTA IIBABKA EE SAFMARKA AH

Dhammaan dadka Ontario ayaa bixiya Canshuurta libaabka ee Safmarka ah (HST) inta badan badeecooyinka macaamiisha. Dadka danyarta ah, Wakaalada Dakhliga ee Canada (CRA) ayaa u celisa dhammaan ama qayb kamid ah canshuurtaan oo ah canshuur dhaaf ahaan. Qasab maaha inaad codsato canshuur dhaafka HST.

CRA ayaa si ootomaatig ah u go'aaminaysa u qalmidaada marka aad soo dirto canshuur celintaada dakhliga sanad kasta. Codsiga bogga koobaad ee canshuur celintaada. Haddii CRA go'aamiso inaad u qalanto, waxaad haysaa jeeg.



Xog badan ka fiiri canada.ca/en/revenue-agency.html ama findlink.at/gst-hst

GUNNADA ILMAHA EE CANADA

Haddii ay kuu joogaan carruur kayar 18 sano, waxaa laga yaabaa inaad hesho Gunnada Ilmaha ee Canada. Haddii aad u qalanto, waxaad heli doontaa lacag bil kasta ah oo aad ka helayso dawlada Canada si lagaaga caawiyo qarashka kaaga baxa ilmahaaga. Cadadka lacagta waxaa lagu jaangoynayaa dakhligaaga iyo tirada ilmaha kugu tiirsan ee aad haysato.



Si aad u ogaato haddii aad u qalanto aadna u codsato, booqo Wakaalada Dakhliga ee Canada oo aad ka helayso canada.ca ama findlink.at/cra-bnfts

GUNNOOYINKA IYO CAAWIMAADA BULSHADA

Gudaha Ontario, barnaamijyada gobalka iyo kuwa federaalka ah ayaa la heli karaa si ay u caawiyaan dadka waajahaaya baahida dhaqaalaha.

CAYMISKA SHAQADA (EI)

Waxaad u qalmi kartaa gunnooyinka EI haddii aad lumiso shaqadaada sabab la xariirta xaalado ka baxsan awoodaada - tusaale, shaqo yari jirta, shaqo ka cayrin xiliyeed ama mid baaxad wayn. Si aad ugu qalanto, waa inaad haysataa wadarta guud ee celceliska saacadaha caymiska lagu helo kara ee shaqo aad ka qabatay Canada 52 asbuuc ee lasoo dhaafay.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan codsashada gunnooyinka EI, la hadal la taliyahaaga dejinta ama booqo Service Canada oo aad ka helayso servicecanada.gc.ca ama findlink.at/ei-app

QORSHAHA LACAGTA HAWLGABKA EE CANADA (CPP)

Marka aad ka shaqayso Ontario, shirkada aad u shaqayso ayaa si otomaatig ah lacag uga jaraysa mushaarkaaga si loogu daro qoondooyinka CPP ayadoo wakiil kaa ah.

Waxaad u qalmaysaa helitaanka lacagta hawlgabka ee CPP haddii:

- Aad kasoo shaqaysay Canada aadna ku darsatay ugu yaraan hal qoondo (lacag) CPP.
- Aad jirto 60 sano, ama da'daadu u dhexayso 60 ilaa 70 sano aadna buuxisay shuruudaha dakhliga iyo qoondada ee sharcigu u dejiyay.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan CPP, booqo Service Canada servicecanada.gc.ca ama findlink.at/cpp

GUNNADA KAYDKA DADKA WAAWAYN (OAS)

OAS waa lacag bile ah oo ay heli karaan dadka waayeelka ah ee jira 65 sano ama ka wayn ee buuxsha aqoonsiga sharci ee Canada iyo shuruudaha daganaanshaha. Waxaad u baahan kartaa inaad codsato si aad u hesho.

Si aad u hesho xog dheeri ah, booqo Service servicecanada.gc.ca ama findlink.at/oldagesecu

CAAWIMAADA BULSHADA


(Ontario Works) Ontario ayaa ka shaqaysa barnaamij caawinaaya dadka reer Ontario ee qaba baahida dhaqaale ee ku meel gaarka ah Waxay siisaa labo adeeg: caawimaad dhaqaale iyo caawimaad la xariirta helitaanka shaqo.

Haddii aad u qalanto, Ontario Works ayaa kaa caawin karta daboolista qarashaadka baahiyahaaga aasaasiga ah sida cuntada iyo guriga. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijkaan iyo shuruudaha u qalmida, booqo Wasaarada Carruurta, Bulshada iyo Adeegyada Bulshada mcss.gov.on.ca ama findlink.at/socialassi

BARNAAMIYADA TAAGEERADA NAAFADA EE ONTARIO (ODSP)

ODSP ayaa caawisa dadka naafada ah ee qaba baahida dhaqaalaha. Barnaamijka ayaa ka caawiya codsadeyaasha u qalma helitaanka shaqooyin siiyana caawimaad dhaqaale oo ay ku maareeyaan qarashaadka cuntada iyo guriga.

Si aad u hesho xog badan oo ku saabsan ODSP, booqo Wasaarada Bulshada iyo Adeegyada Bulshada oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/ont-dsp



QORSHAHA DEJINTA

Si aad u hesho nuqulka faahfaahsan ee qorshaha dejinta, fadlan booqo <http://my.orientationontario.ca/content/settlement-planning-tools>

BANGIGA, QAADASHADA DAYNTA IYO CANSHUURAHA

Raadi dookhyada bangiga oo furo koonto bangi

Codso kaarka daynta

La hadal wakiilkaaga bangiga si aad ugala hadasho adeegyada bangida ee dadka wadanka ku cusub.

Codso Gunnada Carruurta ee Canada (haddii aad u qalanto)

1. Shaqada

Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

2. Shaqada

Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

3. Shaqada

Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

DADKA IYO BII'ADA

Qaytaan ayaa bixinaysa xog kaa caawinaysa fahanka iyo qaar kamid ah mabaadii'ada muhiimka ah ee bulshada isku dhafan ee Ontario. Mabaadii'daan waxaa ku jira sinaanta dhammaan jinsiyada, ilaalinta iyo qadarinta sinaanta qof kasta, u xalinta arimaha qoyska si nabdoon iyo ilaalinta bii'ada.



56

Isdhexgalka

57

Dadka Naafada ah

58

Xariirada Qoyska

59

Daryeelida Bulshada

60

Qorshaha Dejinta





LOO DHAN YAHAY

Ontario waa bulsho isku dhafan oo dadku ku dedaalaan inay wada shaqeeyaan, qofba kan kale wax ka barto ayna abuuraan dhaqan furfurnaan ku dhisan. Waxaad heli doontaa fursado badan oo aad ku barato dadka kaa duwan. Ontariyo ayaa doonaysa inay noqoto goob dadka u furan oo loo dhan yahay - meel qof kasta uu soo dhawayn ku helaayo.

WAXYAABAHA AAD KA FAKARAYSO

Waa maxay qaar kamid ah fikradaha iyo mabaadii'da dhaqankaygu jaangooyo?

Dulqaad intee dhan ayaan ku qabaa dadka iga fikir duwan?

Maxaan ka aqaanaa dhaqannada kale?

Sidee ayaan wax uga baran karaa dhaqannada kale?

Waa maxay fikradaha guud ee dadku ka aaminsan yihiin dhaqankayga?

KALADUWANAANTA IYO WADAJIRKA

Bulshada Ontario waxaa kamid ah dad kala aaminsan dhaqanno iyo diimo badan, oo leh awoodo badan oo kaladuwan, dookhyada galmada oo kaladuwan iyo farqiyada nooc kasta.



Wasaarada Dawlada iyo Adeegyada Macaamiisha ayaa leh qorshe looga dhigaayo Adeegga Dadwaynaha ee Ontario (OPS) goob shaqo oo loo dhan yahay. Si aad xog badan u ogooto booqo ontario.ca ama findlink.at/omgs

Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Ontario ayaa bixinaaya aasaaska wadajirka asagoo sharci daro ka dhigaaya in dadka si cadaalad daro ah loola dhaqmo. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo Gudiga Xuquuqda Aadanaha ee Ontario oo aad ka helayso ohrc.on.ca

SINAANTA RAGGA IYO DUMARKA

Gudaha Canada, sinaanta ragga iyo dumarku waa mabda' aasaasi ah. Dhaqannada liida ama waxyeleeya haweenka ama hablaha ayaan la aqbali doonin.

BULSHADA LGBTQ+

LGBTQ+ waxaa lagasoo gaabshay Hablaha Isku Galmooda, Raga Isku Galmooda, Labo Galmoodle, Nimoow-Naagyada, Qaniisiinta Dadka LGBTQ+ waa xubno sharaf ku dhex leh bulshada Ontario.

Takoorida ama dhibaataaynta dadka sabab la xariirta dookhooda galmadu waa fal sharci daro ah sida uu qabo Xeerka Xuquuqaha Aadanaha ee Ontario.



Xog ka ogoow barnaamijyada ama adeegyada dadka LGBTQ+



settlement.org ama findlink.at/lgbtqservi

YWaxaad sidoo kale wici kartaa ama booqan kartaa serviceontario.ca

DADKA NAAFADA AH

Hal kamid ah todobadii qof oo ku dhaqan Ontario ayaa naafo qaba – qiyaastii 1.85 milyan oo oo reer Ontario ah.⁷ Xili bulshadu sii gaboobaysa, tiradaan ayaa sii kordhaysa. Ontario ayaa higsanaysa inay noqoto goob qof kasta uu bulshada door ku yeesho. Ganacsiyada, ururada iyo bulshooyinka Ontario ayaa ka shaqaynaaya inay noqdaan kuwo u fudud una furan dadka naafada ah.

NAAFADA

Naafada waxaa laga wadaa noocyada badan ee kaladuwan iyo heerarka xaaladaha. Naafooyinka qaar ayaa u muuqda dadka kale halka qaar kale aysan muuqan. Qofka ayaa la dhalan kara naafada ama naafo ku noqon kara shil ama xanuun. Dadka ayaa qabi kara naafada jirka, dhimirka ama waxbarashada; naafooyinka maqalka ama araga; qalalka; naafooyinka caafimaadka dhimirka iyo maandooriyaasha; xasaasiyada bii'ada iyo xanuunnada kale.



Wax badan kaga ogoow khibradaha dadka naafada ah gabayada, maqaallada iyo muuqaallada ay hayaan Gudiga Xuquuqda Aadanaha ee Ontario: ohrc.on.ca ama findlink.at/ohr-IRD

Xog ka ogoow xuquuqaha dadka naafada ah ee ku cad Xeerka Xuquuqaha Aadanaha ee Ontario oo aad ka helayso ohrc.on.ca ama findlink.at/acccsibact

HEERARKA GELITAANKA

Sharciga Ontario ee 2015 ee Xeerka Helitaanka Adeegyada Dadka Naafada ah ee reer Ontario (AODA) ayaa ku baaqay in la aburoo heerarka helitaanka adeegyada. Xeerarkan ayaa qeexaaya waxa dhammaan ganacsiyada iyo ururadu ay tahay inay sameeyaan si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah ay ka qaybgeli karaan adeegyada bulshada Ontario. Yoolku waa in la aburoo Ontario cid kasta heli karto sanadka 2025.

Waxaa jira shan heerarka helitaanka ah:

1. Adeegga Macaamiisha – Dhammaan ururada badeecooyinka iyo adeegyada bixiya waa inay lahaadaan qorshaha qoran oo muujinaaya sida ay adeegga macaamiisha ku siinayaan dadka naafada ah. Qorshaha waxaa ku jiri kara waxyaabaha sida ogolaanshaha xayawaannada adeegga iyo gaari curyaannada, soo dhawaynta shaqsiyaadka taageerada iyo ula hadlida dadka si la fahmi karo

2. Shaqada – Dhammaan ururadu waa inay adeegyada ka dhigaan kuwo ay geli karaa dadka naafada ah qayb rasmi ah oo kamid ah helitaanka shaqada, shaqo gelinta iyo taageerada shaqaalaha. Tan waxaa ku jiri kara, tusaale ahaan, siinta qalab gaar ah ama xaalado shaqo.
3. Xogta iyo xariirka – Ururadu waa inay ka dhigaan dhammaan xogtooda sida buugaagta tusmada, webseedyada iyo agabka waxbarashada kuwo la heli karo.
4. Gaadiidka – Shardigaan ayaa quseeya basaska, tagaasida, gaadiidka gaarka ah ee dadka naafada ah, basaska isbitaallada, basaska dugsiga iyo maraakiibta qaarkood. Shuruudaha waxaa ku jira siinta qalabka qaada dadka, jaranjarooyin, meelaha la cuskado, nal, boor iyo waxyaabo kale.
5. Goobaha Dadwaynaha – Shardigaan wuxuu quseeyaa dhismeyasha iyo goobaha dadwaynaha sida garoonnada, aagaga baakinka iyo aagaga dalxiiska banaanka.



Xog ka ogoow Sharciga Helitaanka Adeegyada ee dadka reer Ontario ee Naafada ah, 2005 oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/acccsibact

Xog badan ka ogoow shuruudaha helitaanka adeegyada oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/acccsstandr

Si aad u hesho xog ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyada dadka naafada ah, wac 211 ama booqo ontario.ca/page/people-disabilities


Barnaamijka Taageerada Naafada ee Ontario ayaa caawiya dadka naafada ah ee qaba baahida dhaqaale. Xog badan ka ogoow ontario.ca ama findlink.at/ont-dsp

⁷Xigasho: ontario.ca ama findlink.at/ont-dsp

THINGS TO THINK ABOUT

How accessible is my workplace?

What invisible disabilities might people around me have?



XARIIRADA

Qoysta ayaa taageero muhiim ah kuu noqon kara inta aad dagayso Ontario. Sharciyada federaalka iyo kuwa gobalka ayaa difaacaaya dhammaan xubnaha qoyska..

GUURKA

Guurku waa aasaaska noloshu qoyska ee dad badan oo ku dhaqan Canada iyo Ontario. Waxaad guursan kartaa keliya hal qof markiiba. Haddii aad qof kale ku qabto wadan kale, waa inaad qofkaas soo furtaa kahor intaadan qof kale ku guursan Ontario. Guurka dadka isku jinsiga ah ayaa sharci ka ahaa Ontario ilaa 2003. Haddii aad la nooshahay lamaanahaaga, laakiin iinaan isqabin, waxaa la idiin aqoonsanayaa "lamaanaha dhaqanka guud" haddii aad xariir joogto ah lahaydeen wax ka badan sadex sano ama hal sano haddii aad ilmo isku dhasheen.

 Welcome to Canada

FURIINKA

Keliya maxkamad ayaa ku siin karta furiinka. Midkood labada xaas (dadka isqaba) ayaa codsan kara furiinka. Waa inaad keentaa cadayn muujinaysa in guurkiinu burburay. Haddii xaaskaagu furiinka kasoo qaadata wadan kale, caadiyan sharci ayaa looga aqoonsadaa Ontario haddii xaaskaagu Canada ka maqnayd ugu yaraan hal sano.

 Welcome to Canada

XADGUDUBKA DADKA ISQABA

Dhammaan noocyada rabshada jirka ee ka dhanka ah xaas, lamaane guud ama xubin kale oo qoyska ah waa sharci daro. Tan waxaa ku jira falka galmada uusan qofku doonayn. Ugu hanjabida inaad waxyeelalaysi ama dilaysi qof ayaa sidoo kale danbi ah. Qofka lagu ogaado inuu galay danbiga rabshada qoyska oo ka dhan ah xubin qoyska ah ayaa la marsiin doonaa ciqaabo daran, ayna ku jirto xabsi.

 Welcome to Canada

DOORKA BOOLIISKA EE BULSHADA CANADA

Booliiska ayaa ka caawiya dadka inay badqab ku helaan deegaankooda waxayna xaqiijiyaan in qof kasta ku dhaqmo sharciyada Canada. Waxaad sidoo kale waydiin kartaa dadka inay kaa caawiyaan dhammaan xaaladaha sida rabshada ka taagan guriga, shilka, dhaawaca shaqsiga ah ama danbiga meesha ka dhacay.

Haddii aad khatar ku jirto, wac 911 kadibna dalbo booliiska. Isla markaba way imaan doonaan gurigaaga. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan doorka booliiska ee Ontario, akhri Kusoo Dhawoow Canada.



Haweenka khatarta ugu jira inuu xadgudub u gaysto qof qoyska kamid ah ayaa wic kara Laynka Gurmada Haweenka La Weeraray oo laga helaayo [1-866-863-0511](tel:1-866-863-0511), 24 saac maalintii, todbito maalmo adbuucii. Waxay bixisaa tallo bixinta masiibada taleefanka iyo ku xirista taageerooyinka iyo adeegyada deegaankaaga.



Booqo webseedka oo ah awhl.org. Sidoo kale, booqo Wasaarada Carruurta, Bulshada iyo Adeegyada Bulshada oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/womenhelp

Waxaad sidoo kale wici kartaa [211](tel:211) si aad u hesho xog ku saabsan adeegyada deegaankaaga sida tallo bixinta qoyska ama aqoon kororsiyada waalidnimada.

XADGUDUBKA IYO DAYACAADA ILMAHA

Xadgudubka ilmuhu waa nooc kasta oo xadgudub jireed, mid dareen iyo/ama mid galmo ama daryeel la'aan keentay dhaawac ama waxyeelo dareen oo ku dhacday ilmo ama qof dhalinyaro ah. Noocyada xadgudubka ilmaha iyo dhalinta waxaa ku jira xadgudubka dareenka, jirka ama galmada (taabasho ama aan taabasho ahayn), in hortoda lagu dagaalamo iyo dayacaad. Dayacaada ayaa lagu aqoonsan karaa ku fashilmida siinta hooy, cunto, dhar, waxbarasho, nadaafad wanaagsan, kormeer, daryeelka caafimaadka, nasiino ku filan, barbaarin wanaagsan, jimicsi, goob amaan ah iyo hawo nadiif ah.



Xog badan ka ogoow xadgudubka iyo dayacaada ilmaha findlink.at/protectchild

Dhammaan dadka waawayn ee Ontario ku nool waa inay soo sheegaan xaalad kasta oo ay uga shakiyaan xadgudub ka dhan ah ilmaha. Marka laga shakiyo xadgudub ama dayac ka dhan ah ilmo, sharciyada difaaca ilmaha ee Ontario ayaa u sahlaaya saraakiisha faya dhawrka ilmaha inay arinta soo faro gashaan ayagoo la hadlaaya waalidiinta, kormeer ku samaynaaya guriga, siinaaya waxbarashada iyo taageerada waalidnimada ama, haddii loo baahdo, ilmaha ka kaxaynaaya guryaha qoyskooda.

AGAASINKA HAWEENKA EE ONTARIO

Hel xog ku saabsan haweenka oo ah dhibaneyaasha rabshada qoyska ama galmada women.gov.on.ca ama findlink.at/serviwomen

Adeegyada Dhibanaha- Wasaarada Garyaqaanka Guud

Hel xog ku saabsan dhibaneyaasha rabshada qoyska iyo galmada oo aad ka helayso attorneygeneral.jus.gov.on.ca ama findlink.at/ovs

Waxbarashada Sharciga Qoyska ee Haweenka

Si aad u hesho sharaxaada xuquuqda haweenka ee ku cad sharciga qoyska ee Ontario, booqo onefamilylaw.ca ama women.gov.on.ca ama findlink.at/flew

Tusmada Sharciga Qoyska

Si aad u hesho sharaxaada xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga ku cad sharciga qoyska ee Ontario, booqo attorneygeneral.jus.gov.on.ca ama findlink.at/on-famlaw

ILAALINTA BII'ADA

Ilaalinta bii'adu waa mabda' aasaasi u ah Ontario. Waxaad samayn kartaa qaybtaada adoo iska ilaalinaaya qashin ku shubida, ka qaybgalaaya barnaamijyada dib u warshadaynta qashinka iyo ilaalinta tamarta.

HAKU DAADIN QASHIN!

Qashin daadintu waa marka aad qashin ku tuurto wadada ama dhulka, gudaha magaallada ama banaanka meelaha baadiyaha.

Inta badan dawlada hoose ee Ontario ayaa leh sharciyo mamnuucaaya daadinta qashinka. Ganaaxyada qashin daadinta ayaa u dhexeeya \$100 ama \$1,000 ama ka badan. Booliiska ayaa joojin doona gaarigaaga haddii ay arkaan inaad qashin ku daadinayso jidwaynaha.


Naga caawi ilaalinta nadaafada dhulka Ontario adoo qashinkaaga ku ridaaya qasaca qashinka ama gurigaaga la aadaaya.

BARNAAMIJKA DIB U WARSHADAYNTA QASHINKA QOYSKA

Barnaamijka dib u warshadaynta ee **Blue Box** ayay heli karaan inta badan qoysaska Ontario. Badelka lagu buuxin lahaa togaga qashinka, qashinka ayaa loo adeegsadaa samayn qalab cusub. Waxaad ku ridi kartaa noocyada kaladuwan ee dhalooyinka, biraha, caagaga iyo xaashiyaha **Blue Box** si ay shaqaalaha nadaafada ee maxaliga ah u qaadaan.

Dawlada hoose qaarkood ayaa sidoo kale leh barnaamijka **Green Bin** kaasoo kuu sahlaaya inaad dib u isticmaasho qashinka maadooyinka oorgaaniga ah sida miraha iyo khudaarta, hilibka, kaluunka iyo miraha qaxwada, iyo kuwo kale oo badan. Qashinka oorgaaniga ah ayaa loo badelaa bacrimin, taasoo loo adeegsado hormarinta ciida beeraha raaxada iyo dhul beereedka.

Si aad u hesho **Blue Box**, ama aad u hesho haddii aagaagu leeyahay barnaamijka Green Bin, la xariira dawladaada hoose.


 Ka fiiri Bogaga Buluuga ah ee buugaaga taleefanka, ama booqo Wasaarada Arrimaha Dawlada Hoose ee Magaallada iyo Guryaha si aad u hesho liiska maamullada magaallada ee Ontario iyo meesha lagala xariiri karo ontario.ca ama findlink.at/muniseroff

BARNAAMIJKA DIB U WARSHADAYNTA ELEKTARONIGA AH


Qashinka elektarooniga ah, oo sidoo kale loo yaqaano qashinka elektarooniga ah, waxaa ku jira agabka sida kaamirooyinka, kumbuyuutarada, shaashadaha waawayn, taleefannada iyo taleefishinnada. Waxaa ka buuxa walxo sun ah – oo qiimo badan – waana inaan lagu ridin togaga qashinka. Marka aad agab elektaroonig ah ka iibsato Ontario, waxaad dhiibaysaa qarashka maamulka bii'ada. Lacagta lagaa qaado ayaa loo adeegsadaa bixinta qarashka dib u warshadaynta ama dayactirka qalabka korontada.

 Booqo recyclemyelectronics.ca si aad u hesho aaga dib u warshadaynta qalabka elektarooniga ah ee deegaankaaga.

TASHIILIDA TAMARTA

 Samaynta koronto ama gaas ayaa saamayn xun ku leh bii'ada. Hadba intaan yareyno isticmaalka ayay kasi fiican tahay. Xog ka ogoow sida aad u tashiili karto tamarta gurigaaga adoo booqanaaya Wasaarada Tamarta, Hormarinta Waqooyiga iyo Macdan Qodista: ontario.ca ama findlink.at/savinenergy

Sidoo kale, booqo Xafiiska Tashiilida Tamarta ee Khayraadka Dabiiciga ah ee Canada oo aad ka helayso oee.nrcan.gc.ca



WAXYAABAH AAD KA FAKARAYSO

Xagee ayaan ka helayaa Blue Box maxaanse ku ridi karaa?

Maamulka magaaladaydu ma leeyihiin barnaamijka Green Bin?

Maxaan samayn karaa si aan gurigayga uga dhigo mif tamarta tashiila?



QORSHAHA DEJINTA

Si aad u hesho nuqulka faahfaahsan ee qorshaha dejinta, fadlan booqo <http://my.orientationontario.ca/content/settlement-planning-tools>

LOO DHAN YAHAY

- Fahanka xuquuqdayda iyo waajibaadka ku cad Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Ontario

ILAALINTA BII'ADA

- | | |
|--|--|
| <input type="checkbox"/> Hel Blue Box (ama bacda dib u warshadaynta) oo aan ka helaaya dawlada magaaladayda. | <input type="checkbox"/> Helista goob la dhigo elektarooniga la isticmaalay gudaha deegaankayga. |
| <input type="checkbox"/> Oggaanshaha in magaaladaydu ay leedahay barnaamijka Green Bin. | <input type="checkbox"/> Raadinta dookhyada tashiilaaya tamarta ee gurigayga. |

1. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta


2. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

3. Shaqada Dhameystir ugu danbayn / /

Ilaha Xogta

LIFAAQYADA



62

Khayraadka Dawlada
Federaalka

63

Wasaaradaha Dawlada
Ontario

64

Tusmada

KHAYRAADKA DAWLADA FEDERAALKA AH

Come to Canada

canada.ca ama findlink.at/ctcextstay

Ma doonaysaa inaad Canada timaado, ama aad sii joogto? Tasmadaan ayaa kaa caawinaysa go'aaminta u qalmidaada, buuxi oo dir codsigaaga.

Adeegyada soo galootiga ee deegaankaaga

canada.ca ama findlink.at/cic-serve

Adeegyada waxaa ku jiri kara caawimaad ku aadan helitaanka meel aad ku noolaato, taageerada shaqo raadinta, qiimaynta iyo casharada luuqada, caawimaad ku aadan buuxinta foomamka iyo xog ku saabsan adeegyada bulshada

Living in Canada Tusmada Ku Noolaanshaha Canada

canada.ca ama findlink.at/cic-lctvac

Ka jawaab su'aalo fudud si aad u hesho caawimaada aad u baahan tahay si aad u degto Canada ama aad wax uga barato nolosha gobalkaan.

Working in Canada

canada.ca ama findlink.at/workincana

Working in Canada waa isha ugu wayn ee Dawlada Canada ee shaqooyinka iyo xogta suuqa shaqaalaha. Waxay bixisaa xogta bilaashka ah ee shaqada iyo xirfada.

Discover Canada: The Rights and Responsibilities of Citizenship Xuquuqda iyo Waajibaadka Muwaadinimada

canada.ca ama findlink.at/cic-study

Waajibaadka Muwaadinimada ayay badanaa adeegsadaan dadka wadanka cusub si ay u bartaan imtaxaanka muwaadinimada.

WASAARADHA DAWLADA ONTARIO

Alberta

alberta.ca/immigration.aspx

British Columbia

welcomebc.ca

Manitoba

immigratemanitoba.com

New Brunswick

welcomenb.ca

Newfoundland and Labrador

gov.nl.ca/immigration

Northwest Territories

ece.gov.nt.ca

Nova Scotia

novascotiainmigration.com

Nunavut

gov.nu.ca

Ontario ontario.ca

Prince Edward Island

gov.pe.ca/immigration

Quebec

immigration-quebec.gouv.qc.ca

Saskatchewan

saskatchewan.ca

Yukon immigration.gov.yk.ca

WASAARADHA DAWLADA ONTARIO

Agriculture, Food and Rural Affairs

omafra.gov.on.ca

Attorney General

attorneygeneral.jus.gov.on.ca

Children, Community and Social Services

ontario.ca/page/ministry-children-community-and-social-services

Colleges and Universities

ontario.ca/page/ministry-colleges-universities

Economic Development Job Creation and Trade

ontario.ca/ministry-economic-development-job-creation-trade

Education

ontario.ca/page/ministry-education

Energy, Northern Development and Mines

ontario.ca/page/ministry-energy-northern-development-and-mines

Environment, Conservation and Parks

ontario.ca/page/ministry-environment-conservation-and-parks

Finance

ontario.ca/page/ministry-finance

Francophone Affairs

ontario.ca/page/ministry-francophone-affairs

Government and Consumer Services

ontario.ca/page/ministry-government-and-consumer-services

Health

health.gov.on.ca

Heritage, Sport, Tourism and Culture Industries

ontario.ca/page/ministry-heritage-sport-tourism-culture-industries

Indigenous Affairs

ontario.ca/page/ministry-indigenous-affairs

Infrastructure

ontario.ca/page/ministry-infrastructure

Intergovernmental Affairs

ontario.ca/page/ministry-intergovernmental-affairs

Labour, Training and Skills Development

ontario.ca/page/ministry-labour-training-skills-development

Long-Term Care

ontario.ca/page/ministry-long-term-care

Municipal Affairs and Housing

ontario.ca/page/ministry-municipal-affairs-housing

Natural Resources and Forestry

ontario.ca/page/ministry-natural-resources-and-forestry

Seniors and Accessibility

ontario.ca/page/ministry-seniors-accessibility

Solicitor General

ontario.ca/page/ministry-solicitor-general

Transportation

ontario.ca/page/ministry-transportation

Treasury Board Secretariat

ontario.ca/page/treasury-board-secretariat

Women's Issues

ontario.ca/page/womens-issues

TUSMADA

tababarada	33	barashada Canada.....	4
bangida.....	50	barashada Ontario.....	6
xuquuqaha aasaasiga ah.....	24	raadinta shaqada	42
gunnooyinka iyo caawimaada bulshada.....	53	suuqa shaqaalaha.....	42
barnaamijka kabista.....	41	qiimeynta luuqada.....	36
Xeerka Xuquuqda iyo Xoriyadaha	24	tababarka luuqada	35
daryeelka ilmaha.....	30	LGBTQ	56
cimilada	9	xuquuqaha sharciga ah.....	24
wacyi gelinta bulshada	17	adeegyada xariirka.....	25
adeegyada xariirka.....	11	daryeelka caafimaadka dhimirka	16
xariirada bulshada iyo nasiinada.....	21	kaarka OHIP.....	15
daynta	51	dadka naafada ah	57
baaskiil wadista	23	adeegyada taleefanka iyo interneed.....	17
dhakhtarka ilkaha	16	adeegyada boostada.....	17
rabshada qoyska	58	gaadiidka daadwaynaha.....	22
darawalnimada	23	nasiinada	21
ruqsada darawalka	22	dib u warshadayn	59
dhaqaalaha	8	kiraysashada gaari.....	22
waxbarashada:		kirada.....	19
<i>waxbarashada dadka waawayn iyo siiwadista.....</i>	<i>34</i>	wakaaladaha dejinta.....	10
<i>dugsiga hoose-dhexe.....</i>	<i>31</i>	Lambarka Caymiska Bulshada.....	40
<i>waxbarashada dugsiga sare kadib.....</i>	<i>33</i>	Bilaabida Ganacsigaaga	46
<i>dugsiga sare.....</i>	<i>31</i>	Canshuuraha	52
lambarada xaalada degdega ah.....	11	tagaasida.....	22
shaqada (shaqo raadin).....	42	gaadiidka.....	22
tashiilida tamarta.....	59	mutadawacnimada.....	21
dhakhtarka qoyska	15	shaqada:	
sharciga qoyska.....	58	<i>raadinta shaqo.....</i>	<i>42</i>
cuntada.....	17	<i>xuquuqaha goobta shaqada.....</i>	<i>44</i>
juquraafiyada	6		
dawlada	5		
daryeelka caafimaadka	14		
fasaxa	44		
guryaha.....	18		
Xeerka Xuquuqda Aadanaha.....	24		
wadajirka	56		



MAHADNAQ

Laanta Adeegyada Soogalootiga ee COSTI ayaa doonaysa inay kamahad celiso taageerada iyo hogaaminta wakaaladaha iyo iskaashatada xubnaha ka ah gudiga soo socda ee maamulka iyo talo bixinta mashruuca, kuwaasoo wada shaqayntoodu noo sahashay abuurista mashruucaan:

Association of Canadian Community Colleges (ACCC), Canadian Immigration Integration Project (CIIP), Catholic Centre for Immigrants - Ottawa, Collège Boréal, Colleges Integrating Immigrants to Employment (CIITE) Project, Fanshawe College, George Brown College, JVS Toronto, Multicultural Council of Windsor and Essex County, Ontario Council of Agencies Serving Immigrants (OCASI), Ontario 211 Services Corporation, Skills International, World Education Services (WES), Kitchener-Waterloo YMCA, YMCA of Greater Toronto.

Waxaan sidoo kale doonaynaa inaan u mahadcelino Centre de santé communautaire Hamilton-Niagara, oo ah iskaashadaheena bulshada francophone, iyo wakaaladaha adeeg bixinta ee qaybta ka ah dhaqan gelin barnaamijkaan billoowga ah kuwaasoo dedaalkooda iyo juhdigoodu suurtagashay in barnaamijku ka dhaqan galo gobalka oo dhan..

- Brampton Multicultural Community Centre
- Catholic Centre for Immigrants
- Catholic Crosscultural Services
- Centre for Immigrant and Community Services
- Centre Communautaire Francophone Windsor-Essex-Kent
- Centre francophone du Grand Toronto
- Collège Boréal
- Conseil Économique et Social d'Ottawa - Carleton
- Culture Link
- Folk Arts Council of St. Catharines Multicultural Centre
- HMC Connections
- Immigrant Services Guelph-Wellington
- Kingston Community Health Centres
- London Cross Cultural Learners Centre
- Multicultural Council of Windsor and Essex County
- Newcomer Centre of Peel
- New Canadians' Centre of Excellence Inc.
- North York Community House
- Peel Multicultural Council
- Polycultural Immigrant & Community Services
- Punjabi Health Community Services
- TNO, The Neighbourhood Organization
- Thunder Bay Multicultural Association
- Upper Canada District School Board
- Vanier Community Service Centre
- Vietnamese Association of Toronto
- WoodGreen Community Services
- YMCA of Hamilton/Burlington/Brantford
- YMCAs of Three Rivers
- YMCA of Simcoe/Muskoka

Mashruucu wuxuu doonayaa inuu doorkiisa qiyo uuna u mahadcesho Albert Casson oo door dhanka farshaxanka ah uga qaybagaly buuggaan shaqada.

Ugu danbayntii, waxaan doonaynaa inaan u mahadcelino dadka gobalka ku cusub kuwaasoo go'aansaday inay Ontario degaan. Haddii aan lahayn doorkooda, dhamaystirka mashruucaan ayaan suuragaleen. Soo dhawaada!